# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:00 AM** **Hansard No.25/5** **Kal-fadhiga 25aad**

**Fadhiyadii 19-23aad *20-27/09/2014***

**Dooda Xeerka Diiwaangalinta Madaniga iyo Codbixiyaasha oo socotey 4 cisho ayna ka qeyb-galeen 35 mudane.**

1. **Md. C/kariim Aw Cali Shabeel:-** In marka qofku qaato cardka nationalityga uu qaato kan Codbixinta ayaan soo jeedinayaa, taasi waxay ina baajineysaa arrimo faro-badan oo marka la qaadanayo cardka cobixinta hadii aan la horeysiin sida caqliga salmiga ahi ina farayo waxay baajineysaa shakigii iyo dareenkii iman lahaa in qofka dhalashadiisa laga shakiyo, markaa waa in lagu qoraa qofku markuu qaato Cardka nationalityga ayuu qaadan karaa kan codbixinta taasna waan adkeynayaa oo qodobadaan soo jeedinayo ayay ka mid tahey.

   Halka ay ku qoran tahey Muwaadin ee erey-bixinta waxa ku qoran waxaa loola jeedaa qofkasta oo buuxiyshuruudaha uu tilmaamey Xeerka jinsiyada ee xeer lr. 22/2002, markaa waa in la sii faah-faahiyaa waayo xildhibaanada badankoodu ma hayaan Xeerkaa.

   **Qodobka 17aad F/2aad** waxaan leeyahay goobta ay 200 oo qof ama in kor u dhaaftey ay kulmaan sidee loo kala xadeynayaa iyo wakhtiga ay qaadaneyso, markaa anigu waxaan leeyahay arrinta farqadani maaha macquul sida halkan loogu qorey oo si ka duwan ayay ku fiican tahay in lagu badalo.

   **Ugu dambeyn waxaan soo jeedinayaa:-**

   - Marka ay xildhibaanadu ka doodaan xeerkan oo la hagaaajiyo sidaan qodobadan aan soo tilmaamey in la ansixiyo.

2. **Md. Maxamed Faarax Qabile:-** Shir-gudoonka iyo Mudanayaashaba ASC, waxaan u arkaa Xeerkani inuu yahey mid xasaasiya, doodan maanta ina hortaalna waxaan qabaa inay tahey dood taabaneysa Qaranka, marka hore laba xeer baa la isa soo dhexgaliyay oo aaney jideyneyn Xeer-hoosaadkeena iyo Dastuurkuba oo meelna kaga tilmaamneyn, Xeerkan jinsiyada waxaa loo soo dalbadey kaabis iyo wax ka badal, Xeerkan Codbixintuna waa mid la curinayo,

markaa waa laba xeer oo mid la curinayo midna wax ka badal yahay, markaa maaha laba arrimood oo la is dhexgalin karo.

Sidaa daraadeed, ma banana in laba xeer oo mid la curinayo midna yahay kaabis iyo wax ka badal la isku daro oo Golahan la horkeeno waana arrin sharci daro ah oo aan meesha qabaneyn, halkan maanta inuu yimaadona may aheyn, Xeerka Codbixinta ooh ore loo laaley, qodobada wax laga badalayo waxaa soo codsadey oo kaabis iyo wax ka badal ku soo sameeyay Gudidda Doorashooyinka, Xeerkaasi muu iman Golaheena, may aheyn in xeerkii wax lagu soo daro ee waxay aheyd isagoo nabad qaba inuu inoo yimaado taasina arrin khiyaamo qaran ah oo laga galey qarankan.

Markaa arrintaasi waa waxaan dhaqan inoo aheyn oo aan dastuurka iyo procedureka Golahan aan aheyn, mayna aheyn in maanta laga dooda oo uu inoo yimaado, arrintaasi waxay hakisey oo meel kaga dhacdey qodobadii ay diirada saarayeen Komishanka Doorashooyinka iyo qaadhaan bixiyayaashu.

Waxaynu wada ogsoonahey heshiis baa dhacey ay xisbiyada qaranku u dhamaayeen oo wada galeen, Xisbiyada Gudoomiyayaashoodu, Komishanka doorashadu, qaadhaan bixiyayaash iyo Madaxweynaha oo la isku afgartey waxna lagu heshiiyay, waxaa lagu heshiiyay labadaa xeer inay isbar-bar socdaan oo aan la isu-dhoweyn, qaadhaan bixiyayaashana wuu gaadhey oo way soo aqbaleen, waxaa loogu soo daaya 10 milyan ee ugu horeeyay ee lagu qaban laha doorashada Golayaasha iyo madaxtooyada, markaa maanta in la daba marteeyaa xaaraan buu ku yahay in saaka halkan la keeno xeerkan, arrintaasina geedi socodkii dimuqraadiyada ayuu dib u dhac ku yahay.

Waxaad ogtihiin siyaasadii arrimaha dibadu meeshay mareyso, hadii maanta xeerkaas aynu ansixino waxay qarankan ku tahey dhabar jab uu Golahani u horseeday qaranka oo aan cidkale loogu mar-marsiiyoon doonin, markaa arrin la qaadan karo maaha in Golaha Wakiiladu gacantiisa ku dilo qaranimada Somaliland.

Xeerkani maaha mid madaniya, taasna waxaan ku cadeynayaa Xeerka madaniga ilaa ilmaha dhashey ilaa da'kastoo oo uu jiro waa Somaliland ayaa lagu cadeynayaa iyo family sheetkii, xeerkani inuu dabar yahay waxaa ku qoran wax ka duwan taas oo uu yahay dabar, waa xeerka diidey inuu cardkii jinsiyada qaato 18 jir, 17jir, iyo 15 jir oo la diiwaangalin waayo, markaa ma oromaa inala degan, waa da'dii ugu badneyd ee aheyd in la cadeeyo Dhalashadooda, waxaan leeyahay Xeerkani waa xeer loogu talo-galey inu qash-qasho Doorashooyinka oo ay dibu dhac ku keento doorashooyinkii qabsoomi lahaa 2015ka.

Waxaan kaloo ku cadeynayaa Wasiirka arrimaha Guduhu wuxuu cadeeyay oo sheegay Xeerkan inay ku kaliftey qaadhaan bixiyayaasha oo dib uga dhacey xiligii wax la diiwaangalin lahaa, taasi waa meel ka dhac, waxaan qabaa inay diidmo cad tahay oo la doonayo doorashooyinkii lagu le'day ee Golayaasha Deegaanka ama mid aan dhicinba in loo horseedo, sababaha uu wasiirka arrimaha guduhu ku taagan yahay bayna ka mid tahay.

Waxaa kaloo jira Xeer dhaqan gal ah ayaa implementationkiisi iyo taaba-galintiisii lagu doodaa, Xeerka uu madaxweynuhu Ururadii Bulshada Madaxtooyada kula shirey ee laga xidhay madaxdii uu la galey heshiiska ee Gudoomiyayaasha Xisbiyada mucaaradka iyo international communityga ma waxa u ansixinaya bay kula tahay ururada bulshada, Xeerka Salaadiintii la dhaqdhaqaajinayo iyo cuqaashii oo la doonayo in laga ansixiyo waxaan qabaa waa jar iska xoornimo ceeb bay ku tahay Qaranimada oo in saaka halkan laga doodo may aheyn.

Sidoo kale wuxuu dabar ku yahay Xeerkani Komishankii doorashooyinka ee shaqadooda gudan lahaa oo badh ay iska xambaaratey Xukuumadu, doorashooyinku waxay khaas u yihiin oo ka garsoora Komishanka doorashooyinka, UCID iyo WADANI midna lagama ogolaadeen inay maamulaan qeyb doorashooyinka ka mid ah, markaa sidee baa iyagoo qeyb ka ah isaga maamushaan, waxaan qabaa waa arrin aan la aqbali Karin, waa arrin qaranimada meel ku dhac ku ah, waa arrin ayna qaadhaan bixiyaashu aqbali Karin, waa arrin loogu talo-galey in lagu baajiyo doorashooyinkii qabsoomi lahaa, oo xeerkani xad gudub buu ku yahay Komishanka doorashooyinka.

Hadii sida ay leeyihiin qaadhaan bixiyaasha ayaa ka habsaamey yaa ka masuul ahaa oo aheyd inay umada hawshaa inay uga masuul aheyd mise iyagey ka sugayeen, hadii ay ka habsaantey waa xil ay leedahay iyageyna u taal, laakiin Heshiiskii ay gashey waa inuu sidiisii ahaadaa.

**Waxaan Soo jeedinayaa ugu dambeyntii:-**

- Mudanayaal lama arag Xeer aan ka soo bixin Golayaasha Sharci-dejinta oo la iska dhaqan-galiyo, markaa waxay ka dhigan tahay xilkii golayaasha sharci-dejintu cid kale iska xambaaratey, markaa hadii Golahani ogolaado waa cawaaqib xumo ay dhabarka kaga jabayaan umadii soo dooratey, marka waxaan leeyahay Xeer noocaas oo kale ah sida kan yaynaan ansixin.

3. **Md. Cali Obsiiye Diiriye:-** dhamaan waan idin salaamayaa shirgudoonka, xildhibaanada iyo saxaafadaba. Xeerkani waa xeer 37 oo wax kabadal iyo kaabis lagu sameeyay weeyaan ee yaan dadka jahawareer lagu ridin, diwaan galintuna wax kabadal iyo kaabis ayaa lagu sameeyay ee waa in dadku sidaa u ogaadaan.

   Waxaanan leeyahay dadka qaar ayaa waxay leeyihiin dad aan kaadida iska duwayn ayaa wax u samaynaya Somaliland, taasi wax la sheego maahan ee waxaad tidhaa ilaahay ma ogola, anigu waxaan leeyahay xeerkan sidiisa halagu arsixiyo iyada oo lagu darayo lifaaqa ay gudidda arimaha guduhu soo raacisay oo yaanu inagu habsaamin.

   Qodobka labaad ee aan ka hadlayaa waxa uu yahay in aan dadka laqaldin, xeerkanu waa mid faaido inoo leh, waxaanu anfacayaa Waxbarashada, caafimaadka iyo Somaliland nimada oo meesha waxaa uu ka saarayaa ajaanibka oo waa cadayn u yahay muwaadinimada oo dhinac walba wuu ka anfacayaa.

   Tusaale ahaan markii dawladu kordhisay mushaharka shaqalaha waxaa la lahaa way ku fashilmaysaa, sidoo kale darajada waa laga hadlayaayay laakiin waxay noqotay muunad u soo koradhay ciidamada Qaranka, sidaa daraadeed diwaan galintana waa lagu guulaysanayaa sida aan ugu najaxnay kuwii horaba.

   **Waxaan soo jeedinayaa:-**

   - In xeerka sidaa lagu arsixiyo marka lifaaqa la raaciyo waad mahadsantihiin

4. **Md. C/raxmaan Cismaan Caalin:-** mudane shirgudoon iyo mudanayaalba waan idin salaamayaa , marlabaadka waxaan salaamayaa xukuumada xeerkan quruxda badan ee sida wanaagsan loo soo agaasimay noosoo gudbisay, mar sadexaadkana waxaan u mahad celinayaa gudidda sida xilqaadka ah looga soo shaqeeayay ee is badalada ku soo sameeyay ayaan salamayaa ee labada dhinacba ka kooban.

   Marka hore waxaan in yar faahfaahin ka bixinayaa xeerkan lagu sheegayo in aanu is qaban Karin, waxaan halkan ka cadaynayaa in xeerkan kaabista lagu sameeyay uu yahay xeerka diwaan galinta cobixiyayaasha ee aan u naqaanay 37 xeerka la kaabay wax ka badalka lagu sameeyayna waa kaa waxaana lagu kaabay xeerka codbixiyayaasha muwaadiniinta isbadalada lagu sameeyayna waxaa ka mid aha iyada oo farta aheyd ayaa indhaha loo badaley oo aan

jecelahay inay isbadalalada ka mid noqoto xeerkana lagu daro, Markaa yaan confusion la galin Xeerkan la kaabey, waxaa confusionka keenay sida iminka qoraalka ugu kala horeeyaan ayaa u baahan in la yidhaahdo kaabista la sameeyay waxa weeye Xeerkii diiwaangalinta ayaa xeer lagu kaabey.

Hadaaan xeerka gudihiisa galo, **Qodobka 2aad** Erey bixinta kalmada “diiwaanada guud” waxay u baahan tahay halkaa in la saxo oo la yidhaahdo “diiwaanka guud” halka diiwaanada guud laga leeyahay, waayo isku mid noqonaya Diiwaanka Gobolada ama degmooyinka iyo tan komshinka, waayo laba diiwaangalinood ma jiraan waa diiwaan kaliya, marka taa iyadana sidaa ha loo qaato.

Waxaa iyana mudan oo aan leeyahay labda diiwaanaglinood sidey xeerka ugu kala horeeyaan ha u kala horeeyaan, Diiwaangalinta Muwaadinka in muwaadin kasta uu qaato kaadhka Muwaadinimada, ka dibna la bilaabo Diiwaangalinta Codbixiyayaasha oo qofka xaq u leh uu qaato oo sidaa looka la horeysiiyo, waxaan u jeedaa hadaan muwaadinku kaadhka qaadan kan codbixinta ma qaadan karo.

Arrin wakhtiya ayaa laga hadlayaa, maxaa la yeelayaa marka ay dhamaato diiwaangalinta muwaadinimada, Xeerkan waxaanu ku basegareynay in laba diiwaanglinood kala dambeeyaan, laba xeer mar mawada shaqeyn karaan oo mawada bilaabmi karaan, waxaan leeyahay aan soo jeedinayaa, marka tan Muwaadinimadu dhamaato oo muwaadin walba qaato kaadhkiisa ee ay gaadho xiligii la bilaabi lahaa kaadhka codbixinta hadii ay jiraan dad aan qaadan kaadhka muwaadnimada waxaa kawada hadlaya oo go’aan kawada gaadhaya komishanka iyo wasaarada daakhiliga, waayo, xeerka ma galin karno ha isbar bar socdaan, markaa iney laba ra’yi wada-galinaa xeerka validation bay ku tahay, waxaynu galineynaa oo kaliya labada xeer ha kala dambeeyaan, hadii xeerka wax ka badal lagu sameynay xisbiyada qaranku ha wada hadlaan oo xeerka Golaha ayay dib ugu soo celin karaan.

Waxaan aad ugu mahadnaqayaa Gudidda Arrimaha Gudaha ee Xeerkan ka soo shaqeeyay, waxay isku saxeen **Qodobka 7aad iyo Qodobka 25aad**, waxaan leeyahay sixitaanka ay labadaa Qodob ku soo sameeyeen sidooda ha loo qaato.

**Qodobka 17aad F/1aad** waxaa ku taala qofka is diiwaanglinaya waxaa xaqiijinaya Caaqil, caaqil kaliya ma tagi karo goobaha oo dhan oo maaha macquul, waxaan ku darayaa oo aan ka dhigayaa **“Caaqilka, Suldaanada, Golaha Wakiilad, Golaha Guurtida, Golaha deegaanka, Wasiirada iyo Xubnaha Odayaasha ee muhiimka ah ee deegaanka”** qodobka

dhamaadkiisana lagu daro **"ka dib marka ay xaqiijiyaan xubnaha sare ku xusan"**

Waxaa isna sixida la wadaaagaya **F/4aad ee Qodobka 18aad** oo noqoneysa "qofkasta oo ku guuldareysa inay masuuliyiintaasi cadeeyaan Muwaadinimadiisa" markaa hadii intaasi xaqiijin weydo waa inuu qof kale doontaa way dhici kartaa oo waa arrin muhiima.

**Qodobada 25aad iyo 26aad** waa mabaadiida aynu dooneyno inaynu qaadano oo sidooda u dhaqangalan oo ay la jaanqaadayaan qodobada aynu soo sheegney, waana mabaadiida guud ee aynu dooneyno inaynu qaadano oo ka duulno.

**Waxaan Mudanayal iyo Marwooyin ku soo gabo-gabeynayaa:-**

- Diiwaanglinta muwaadiniinta isu diiwaangalineysa inay ka qeyb-qaataan, waa arrin muhiima oo qaranimadeena u wanaagsan oo asaas u ah qaranimadeena, hadii aynaan taa hirgalin codbixiye aynu doorasho u codeynaa ina anficimeyso, waa inaynu dibu u eegnaa oo ay taariikhdu ina bartey marka doorashadu soo dhowaato waynu wareernaa oo waxaynu ku wareernaa codbixinta, laakiin dhibaatadeeda waxaynu dareenaa markey dhamaato, sanadkii dhoweyd waxaynu ku siganey doorashadii deegaanka inaynu bur-burno oo is boobno, ninka doonaya inuu diiwangalinta muwaadinmada ka cararo in la isboobo ayuu doonaya, taasina waxay khatar u tahey nabadgalyada qaranka, markaa hadeynu dooneyno nabadgalyadeena inaynu ilaashano waa inaynaan sameysan waxaynu isku dilno.

5. **Md. Faarax Maxamuud Cabdule:-** dhamaan waan salaamayaa shirgudoonka iyo xildhibaanadaba Bacda salaam **Qodobka 2aad** ee ah eray bixinta codbixye waxaa loola jeedo muwaadinkasta oo xaq u leh inuu doorto halkaa waxaan ku dari lahaa ama la doorto, meesha ay ku qoran tahay sida eray bixinta komishanka waxaa lagu macneeyey waxaa loola jeedaa komishanka dooroshooyinka qaranka, waa in halkaa lagu badalo komishanka marka la sii macnaynayo komishanka macnihiisu waxaa loola jeedaa guddidda dooroshooyinka qaranka.

**Qodobka 5aad** diwaanadu waa haniti umadeed, diwaanka codbixiyaasha xisbi kasta oo umadeed waxaa uu xaq u leeyahay inuu noqdo waxaa uu xaq u leeyahay inuu la socdo habaynta dhaqan galinta iyo daabacaada diwaanka halkaa waxaan anigu kusii daray marka hawlahaasi socdaana waa in wakiil ka joogo xisbiyada qaranka.

**Qodobka 6aad** oo ah dadka ay reeban tahay in la diwaan galiyo farqada afraad oo ah qofka aan gaadhin dada diwaan galinta waxaan kusii daray laakiin lagu qorayo liiska aabihii ama masuulkiisa family sheet intaasna lagu daro baan soo jeedinayaa.

**Qodobka 9aad** ee ah habka xafidaada qalabka diwaan galinta waxaan anigyu kusii daray farqad afraad haday diwaan galintu ku socon waydo arimo dabiiciya sida roob dabaylo baqdin wado xumo oo ay ku habsaanto iyo wixii la mida waa in loo tix galiyo looguna daro wakhtiga dheeraadka ah ee ay habsaantay iyadoo sidaa lagu qorayo foomka codbixinta.

**Qodobka 13aad** ee ka hadlaya lumista warqada aqoonsiga ama codbixinta maqodobaysna laakiin waxaan kusii daray warqada aqoonsiga e luntay cidii hesha waa inay keento meesha ugu dhow e degmo ama gobol dawlada hoose ama komishanka.

**Qodobka 14aad** wuxuu ka hadlayaa dhawrista xogta muwaadinka farqada 5aad waxaa reeban in xogta muwaadiniinta halkaa waxaan kusii daray iyo xogta codbixiyaha loo gudbiyo dal shisheye ama hayado ajanabi ah. Qodobka 15aad oo ka hadlaya qaadashada wax kabadalka hal warqad aqoonsi ama codayn wax ka badan qofkii qaata haduu muwaadinku si khiyaamo ah u qaato wax uga badalo ama u ben abuuro warqad aqoonsi ama codbixineed ama wax kabadan wuxuu mutaysanayaa ciqaabta ku qoran xeerkan sidaa lagaga hor cadeeyo maxkamada horteeda intaasbaan kusii daray.

**qodobka 17aad farqada 1aad** waxay ka hadlaysaa qofka raba inuu isdiwaan galiyo waxaa xaqiijinaya caaqilka waxaana ansixinaya wakiilka maxkamada kadib marka uu sidaa ku dhaariyo caaqilku halkaa waxaan leeyahay kuma filna caaqilka sida rag iga horeeyayba shegeen waxaan kusii dari lahaa ama qof hore loo xaqiijiyay muwaadinimadiisa oo ah oday beel intaa in lagu sii daro waxaan kaloon kusii dari lahaa **farqad 3aad** oo cusub marka la samaynayo warqada muwaadinimada waxaa ku waajib ah maamulada gobolada degmooyinka iyo tuulooyinku inayu ku wargaliyaan cuqaasha iyo odoyada deegaanka inay yimaadaan goobahaa si ay u xaqiijiyaan qofkasta muwaadinimadiisa waayo caaqilkii hadaan loo sheegin shaqadii in halkan laga rabo waxaa weeye hawshii halkan ka socon mayso.

**Qodobka 18aad farqada 4aad** waxaan leeyahay waa in laga saaraa oo odhanaysa qofka kasta oo ku guul daraysta inuu caaqil ka hor cadeeyo muwaadinimadiisa inuu keeno qof layaqaano oo hanta maguurto ah ku leh deegaanka dalka oo cadaynaya inuu yahay muwaadin reer Somaliland ah kuna damiinto hantidiisa, anigu waxaan leeyahay anigu taasi maba jirto waana kalifaad qofku haduu caaqil waayo wuxuu helaya odaykale oo lagu dhaarin laha ama xildhibaan golaha wakiilada ah buu helaya ama mid

deegaan ama suldaan buu helayaa masuul waayi maayo markaa waxaan leeyahay farqadaas waa kalifaad waa in meesha laga saaro.

**Qodobka 23aad** waa shaqaalaha diwaan galinta muwaadinimada waxaan kusii daray **farqada 3aad** xarafkeeda **D** oo aan u qoray sidan laguna dhaariyo inuu daacad ka yahay hawsha uu u xil saaran yahay si wadaniyad ah waxaana dhaarinaya gudoomiyaha maxkamada gobolka degmada hadba heerka xuquuq ee uu hayo.

**Qodobka 34aad** habka iyo goobaha diwaan galinta codbixiyayaasha komishanka dooroshooyinka waxaa ku waajib ah inay kormeeraan goobaha codbixineed inta aan la qaban doorashada ka hor si ay usoo cayimaan goobaha laga codbixinayo hadii ay jiraan goobo aan ku jirin diwaanka codbixinta ku jirin waa inay kormeer ku sameeyaan intaanay diwaan galinta codbixintu soo bixin farqadaa ayaan ku daray. Qodobka ugu dambeeya ee 44 wuxuu u qornaa waxaa uu dhaqan galayaa marka uu madaxweynuhu saxeexo faafinta rasmiga ahna lagu soo saaro waxaa ka dhiman xeerkan sidii aynu ku ansixin jirnay xeerarka sida dastuurku sheegayo xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka golayaasha sharci dajintu ansixiyaan madaxweynuhuna saxeexo

**Waxaan soo jeedinayaa Soo jeedin:-**

Xeerkani inuu yahay xeer muhiima iyadoo aan dib looga dhigayn inay doorashadu dib u dhacdo hadana waxaa weey xeerkan ma diidi karno waa xeer aad iyoi aad dadka ugu muhiima wixii sida aynu isku waafajinayno iyo nidaamka loo dhigayo waxay ku xidhan tahay sidii loo dhigayo laakiin inagu marnaba ma diidi karno anigu waxan soo jeedinayaa xeerkan wixii laga badalayo inay xildhibaanadu xil iska saaraan wax ka badalaan ansixiyaan baan soo jeedinayaa wasalaama calaykum

6. **Siciid Warsame ismaaciil :-** Bacda salaam, Waxaan ka bilaabayaa magaca xeerka waxaan aaminsanahay inuu ahaa xeer 37 oo ay dheeraad ku tahay xeerka diwaan galinta muwaadinku waxaan arkayaa in laba xeer oo aan islahayn ujeedo kala duwana wata ay isku jiraan, kuwaas oo shaqo markay wataana laba hay'adood shaqadoodu kala tahay xeerkan magaciisa waxaan jeclahay in la dhigo wax – kabedelka iyo kaabista codbixiyayaasha, oo laga saaro diwaan galinta muwaadinka, sababtaan u leeyahay waxaa weeye muwaadinka in la diwaan galiyaa waa laga maarmaan hadaba waxaa meesha taal labadan xeer isma qaadan karaan shaqo ahaan iyo ujeedo ahaan diwaan galinta muwaadinku waxay noqotaa diwaan galinta dhalashada, dhimashada, guurka iyo meherka taas oo base ay u tahay waxan la idhaahdo family sheet

ku, diwaangalinta muwaadinku waa mid aan u baahnayn degdegsiinyo iyo in la siyaasadeeyo midna.

Diwaan galinta muwaadinku sidoo kale hadii uu macnuhu yahay kaadhka aqoonsiga ee muwaadinku waxaa jira imikaba in muwaadiniintu ay kaadh qaadato oo waliba sifo sharci ah ku qaadato oo waliba cadeeyey xeerka jinsiyada hadii dadka la waydiiyo dowlada hoose ee hargeisa ta berbera ta ceerigaabo intuba waxay bixiyaan kaadhadh muwaadin oo Somaliland ah, oo maray sifadii sharciga ahayd caaqilna cadeeyey kana saxsan sidan imika loo wado.

Anuu waxaan u arkaa is dhex galinta labadan xeer inay caqabad ku tahay inay doorooshooyin dalka ka dhacaan taasina waxay mugdi galinaysaa qaranimada Somaliland oo horosocodkii dimquraadiyada meesha laga waayo waxaan kaloow ku fiican tahay si loo sugo heshiiskii sanadka socday ee ay gaadheen saddexda xisbi qaran xukuumada, komishanka, civil societyga isla markaana qaadhaan bixiyaayaashu ay markhaatiga ka ahaayeen isla markaana madaxweynuhu markhaatiga ka ahaa warqadana saxeexay si gaarana ugu xusay isagoo walibana si gaara ugu xusay in xeerka diwaan galinta madaniga ah laga fogeeyo siyaasada isla markaana laga dhigo dual tracks, sidaa awgeed waxaan soo jeedinayaa in labadan xeer lakala saaro mid walbana walbana muhiimadiisa uu leeyahay lana soo hormariyo xeerka diwaan galinta codbixiyaasha kan kalena wakhtigeeda la siiyo isla markaana diwaan galinta madaniga ah lagu wareejiyo dowladaha hoose. Mudanayaan waxaan kusoo gabagabeynayaa hadii la doonayo in doorasho inoo dhacdo wakhtiyadeeda oo dalkeenuna markaa badbaado waxna ugu kordhaan.

**Mudanayaal:-**

- Anagoo eegayna horumarka dalka iyo xaaladaha inagu soo wajahan ee inagu waajahan in labadaa xeer lakala saaro lana ansixiyo xeerka codbixiyayaasha, marka hore isla markaana la develop gareeyo xeerkan cusub ee diwaan galinta madaniga ah iyagana marka la diyaariyo la ansixiyo, loona gudbiyo dowladaha hoose.

7. **Maxamuud Jaamac Warfaa:-** Anigu waxaan kaliyaata oon muujinayaa oon doonayaa inaan dul istaago xeerkan kaabista iyo wax ka bedelka diwaan galinta ay soo gudbiyeen in lasoo hormariyo diwaan galinta maxaliga ah sababtuna waxaa weeye qofku hadii aanu haysan ID wax cadaynaya inuu yahay muwaadin u malayn mayo in diwaan galintiisii codbixintu ay tahay nidaamsan oo sharciya markaa waxaa wanaagsan in diwaangalinta maxaliga ah lasoo hormariyo dabadeedna la cadeeyo qofku inuu yahay mid muwaadina

kaadhka muwaadinimada markuu qaatana la siiyo kaadhka codbixinta oo sidaa loo cadeeyo goobaha diwaan galinta laga bixinayo waxaan taabacsanahay in laga dhigo in goobihii tii hore lagu qabtay laga dhigo ayaan taabacsanahay iyadna doodaydana intaas baan kusoo gabagabeeyey.

8. **Axmed Maxamed Diiriye:-** Waxaad moodaa xildhibaan c.raxmaan iyo xildhibaanadii iga horeeyey doodii ay galeen ay aad iyo aad ugu fogaadeen oo wixii meesha ku jirayba, anigu sii badinba maayo anigu waxaan leeyahay lifaaqii guddiddu ay inoo keentay ee ay kaga hadlaysay in diwaan galinta madaniga ah marka hore la bilaabo ee lagu kala sooco ninka muwaadinka ah iyo ninka inagaga imid Somalia iyo oromada aynu kala soocno markaynnu kala saarnana aynu bilaabnoo diwaan galintii codbixiyayaasha oo halkaa aynu ku dhakhsano oo qoladan mucaaradka ah ee dib u ridaya.

| **Opened: - 10:08 AM** | **DAY TWO** | **Kal-fadhiga 25aad** |
|---|---|---|

**Fadhigii 20aad 22/09/2014**

9. **Md. Xuseen Maxamed Cige:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo Marti-sharafta marka hore ASC, marka hore waxaan mudanayaasha u soo jeedinayaa mudada inoo hadhey ee 9 bilood ah aynu is muujino oo umadii ina soo dooratey aynu u shaqeyno, taas markaan ka gudbo, ee ku saabsan xeerkan ina horyaal ee Diiwaangalinta doorashooyinka, Waraaqdan Madaxweynuhu inoo soo gudbiyay aad baan u dhuuxay waana ayidsanahey mayna aheyn inay markii horeba halkan inala gaadho oo markii horeba heshiiyo badan baa la galay inay ku socono ayay aheyd, iminka sida ay u dhacdey alxamdulilaah.

Xeerkan kumaan arag heshiiska la galey ee aheyd in indhaha laga qaado dadka la diiwaangalinayo, waxyaabihii lagu heshiiyayna way ka mid aheyd, marka waxaan odhan lahaa Xeerka ha lagu daro in indhaha laga qaado dadka la diiwaangalinayo.

Had iyo jeer inaynu isku qab-qabsano maaha doorashooyinka, wax kasta in meel la dhigo ayaa qurux badan, markaa anigu waxaan soo jeedinayaa in Xeerkan lagu daro in 5tii sanadoodba doorashada Madaxweynaha iyo Golaha Wakiiladu dhacdo mar oo ah 26ka june si ay u cayinaato Xeerkana ka muuqato si ay sharic u noqoto oo aan lagu murmin ama la isku qabsan xiliga doorasho dhaceyso, maalin maalmaha ka mid ahna koley intayada da'da weyni joogimeyso eh in doorashooyinka oo dham lawada mideeyo oo ay mar wada dhacaan.

Waxaan kaloo soo jeedinayaa, waxaa suuqa ku jirta in korodhsiimo loo danleeyahay oo la doonayo oo dadweynihii sidaas ayaa u muuqatey, markaa waxaan soo jeedinayaa in Doorashada 2015ka ayna dib uga dhicin 26ka june oo ay wada qabsoonto doorashada Madaxweynaha iyo Golaha Wakiiladu.

10. **Md. Ibraahim Axmed Heybe:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Saxaafada iyo martida sharafta leh waxaan leeyahay ASC, intaanan Xeerka toos u galin waxaynu mar walba ka maqalnaa oo dadweynuhu jecelyihiin in wadanka mar walba u baahan yahay doorasho xor iyo xalaal ah, waa run doorashooyin baa ina soo maray dhibaato badan baa inaga soo martey oo waxaynu ku siganey dagaal sokeeye, sababihii aynu kaga bixi laheyn baynu u baahanahey, marka la leeyahay xor iyo xalaal waxaa wanaagsan in la yidhaahdo sidee loo helaya? sidoo loo gaadhayaa? habkee ayaynu qaadanaa?, waxaan uga jeedaa diiwaangalinta Madaniga ah waxa weeye yaa codeynaya horta, yaa wax dooranaya?, marka sida lagu helayaa waxa weeye Xeerka ina horyaal ee Diiwaangalinta Madaniga ah inaynu hirgalino oo sidaasa loogu dhaqmo.

**Hadaan u noqdo Xeerka waxaan:-**

- ✓ marka hore taageersanahey sida ay u soo gudbiyeen Gudidda Arrimaha Gudaha lifaaqooda isbadalka **Qodobka 7aad** ay u sameeyeena waan raacsanahey oo waan taageersanahey.
- ✓ **Qodobka 17aad** wuxuu leeyahay *“qofka doonaya inuu is-diiwaangaliyo waxaa xaqiijinaya Caaqil waxaana ansixinaya Wakiilka maxkamada ka dib markuu sidaa u dhaariyo caaqilku”* halkaa waxaan ku dari lahaa **f/1aad “qofka raba inuu isu diiwaangaliyo diiwaangalinta Madaniga ah waxaa loo raacyaa Xeerka jinsiyada ee Xeer Lr. 22/2002 tilmaamaha uu siinayo”** sidoo kale xaqiijinta **F/2aad “qofku yahay muwaadin waxaa xaqiijinaya oo loo dhaarinayaa qof masuul ah”** caaqil ha noqdo ama qofkale bulshada magac ku leh sida heedh tuulo ha noqdee ama odey dhaqameed ha noqdo ama xildhibaan ha noqdee, **F/3aad** iyada sideeda ayaan u deynayaa.
- ✓ Waxaan secondgareynayaa oo aan taageersanahay dooda Xildhibaanadii iga horeeyay ee Xidhibaan C/raxmaan sida ay uga hadleen Qodobada **25aad iyo 26aad**

***Waxaan ku soo gabo-gabeynaa:-***

- Sharcigan siduu u dhan yahay oo tacdiilaadkaa aan soo sheegay lagu sameey in sidiisa loo ansixiyo oo aan waxba laga taa-taaban.

11. **Md. Baar Siciid Faarax:-** marka hore dee koley waxaynu ka doodeynaba ee la iskaga hor-imanayay waxbaa laga badaley oo qeyb waa laga heshiiyay, anigu waxaan ku darsanayaa Diiwaangalinta Muwaadinka waxay aheyd markii horeba socon jirey oo dawladaha hoose ay sameyn jireen waana wax muhiima, laakiin maaha inay doorashada is hortaagto oo doorashada oo wakhtigeedii taagan iyada la soo galiyo meesha, hadii iminka in barnaamij weyn oo kaambeyn ah laga dhigo waxaa ka wanaagasan qofku markuu u baahdo inuu kaadhkiisa qaato, hadii wakhti lagu xidhona dadkeenii waa reer miyi waa dad reer guuraa ah oo ma helayaan kaadhkii, markaa waxaan leeyahay yaan wakhti cayiman lagu xidhin oo ha iska socoto.

Waxaan kaloo soo jeedinayaa in Diiwaangalinta Codbixiyayaasha in wakhtigeeda la qabto si aaney doorashadu dib ugu dhicin, inagu meesha weynu ku raagney oo 10kii sanadood baa inoo dhow-dhow, umadu waxay xiiseysaa is badalka oo qofku haduu meesha ku raago waa la nacaa xataa haduu qof saliima yahay oo wanaagsan**.**

**Markaa anigu waxaan soo jeedinayaa:-**

- Doorashadu inaaney dib u dhicin oo wakhtigeedii la qabto, diiwaangalintii codbixiyayaashana inta doorashada ka horeysa la bilaabo oo la dhameystiro, heshiiskana waan soo dhoweyneynaa iyo warqada Madaxweynuhu inoo soo qorey.

12. **Md. Maxamuud Axmed Obsiiye:-** shir-gudoonka, Xildhibaanda iyo martida sharafta leh waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka ASC, sidii xildhibaanadii iga horeeyay sheegeen xeerkani muhiimad weyn buu u leeyahay dalka iyo dadkaba, madaama aynu Masuuliyiinta wadanka nahey oo Golihii wakiilada naheyna sidii ugu quruxda badneyd inuu ku soo baxo xeerku.

Xeerkan waxaa haboo inaynu gudo-galo, ahmiyada uu leeyahay xeerkani waxaa ugu yar in diiwaangalinta madaniga ah ay soo baxdo oo diiwaangalin haboon oo wanaagsan ay mujtamaca u soo baxdo doorashoba yaaney dhicin, hadii diiwaangalinta madaniga ahi xumaato dee doorashadiina way inaga xumaaneysaa, sidaa darteed Qodobka 17aad ayaa muhiima in culeys gaar ah la saaro.

Soo jeedimaheyga Xeerka waxaa ugu horeysa Ciwaanka Xeerka, Xeerkani wuxu u baahan yahay inuu noqdo Xeer kaabis ah, waxa weeye **"kaabista iyo wax ka badalka Xeerka Diiwaangalinta Codbixiyayaasha iyo Madaniga ee Xeer Lr. 37,** halkaasi waa muhiim si aanu u noqon Xeer cusub, waxaan gudo-galo, Erey-bixinta waxaa ku qoran *"Diiwaanka guud" Waxa loola jeedaa diiwaannada dhexe ee la dhigo xaruntaWasaaradda Arimaha Gudaha ama Komishanka Doorashooyinka*, anigu waxaan ka dhigi lahaa halkaa dambe ee

ama ku qoran tahay **"iyo komishanka doorashooyinka"** wixii madaniga soo marey ayaa soo maraya diiwaangalinta Codbixiyayaasha.

**Qodobka 6aad F/4aad** waxaa ku qoran *"Qofka aan gaadhin da'da diiwaangelinta"* da'da diiwaangalintu kuma cada meesha, markaa waxaa kaga haboon in diiwaangalinta halka la leeyahay halkaa in lagu qoro **diiwaangalinta codbixiyayaasha**, waayo wasiirku wuu sheegay inay jirto wax cadeynaya in family sheet la qaato.

**Qodobka 9aad** anigu waxaan qabaa in lagu daro in diiwaagalinta madaniga ah ay socoto oo aaney marnaba istaagin sida ay ku heshiiyeen axsaabta siyaasadu wayna mahadsan yihiin waana taageersanahey, waayo diiwaangailntu bilow bay leedahaye dhamaad malaha.

**Qodobka 12aad** waxaan ku dari lahaa **F/3aad** oo ah "**warqada lunta (kaadhka) waa in meesha ugu dhow ee xarun dawladeed ah gaar ahaan dawladaha hoose iyo saldhigyada booliiska"** waayo hadii qofka muwaadinka ah ay ka lunto waan ay jirtaa meel kaadhka la helay la geyn karo.

**Qodobka 15aad** waxaan ku taageersanahey Xildhibaankii iga horeeyay, waa in lagu daro **"marka laga hor cadeeyo Maxkamada"** waayo waa in si sharci loogu cadeeyo oo maxkamadi ku cadeysa.

**Qodobka 17aad** sugida muwaadinmada oo ah qodobka ugu muhiimsan Xeerkan, waana qodobka si doorasho xor iyo xalaal ahi u dhacdo loo baahan yahay in la kortaago, iyadoo Xeerkii jinsiyadu si faah-faahsan u qorayo, dadku waxay diiwaangalinta u qaateen in la codeeyo oo doorasho la galo, ka dibna la iska tuuro, kharashkii ku baxayna ay sidaa ku khasaarto, qodobkan laba qodob baa lagu xusay, markaa hadii la rabo in diiwaangalin wanaagsani dhacdo Dawladaha Hoose iyo Wasaarada Arrimaha Guduhu ha ka hawlgalaan registrationada jira dalka sida kan shaqaalaha iyo iskuulada.

waajibkuna waa in diiwaangalin wanaagsan dhacdo, waxaan kaloo soo jeedinayaa in hay'ada shaqaalah lagu daro in shaqo kasta oo la iclaamiyo muwaadin Somaliland ah uu qabto, Teysaraha dawalada hoose ka soo baxa isna uu noqdo qaab lagu diiwaangalinayo oo laga duulayo oo aan la tuurin wixii hore ee laga duulo, qodobkani waa kan ugu muhiimsan diiwaangalinta muwaadinka ee diiwaan rasmiya la helo.

Sidoo kale waxaa muhiima **Qodobka 21aad,** waxaa ka maqan waxyaabo muhiima Wasiirkuna uu sheegay inay ku jirto diiwaangalinta sida loo sameynayo, Markaa waxaan ku daryaa **F/7aad** oo noqoneysa mid muujineysa inuu doob yahay iyo inuu xaas yahay markaa waxay noqoneysaa **"xaaladda guur (marital status)"** haduu xaas yahay sidii la sheegay haduu xaas yahay

waa in family sheet oo qofkasta oo muwaadin ah lagu wargaliyaa inuu taxo familygiisa tiradooda iyo da'dooda, markaa si aaney u noqon diiwaangalin ku meel gaadh ah oo aan la odhan 15 jir ba la diiwaangalinayaa, markaa waa qodob muhiima si muwaadin kasta loo ogaado family sheetkiisa inuu haysto.

***Waxaan soo jeedinayaa:-***

- Waxaa lagama maarmaan ah si doorasho xor oo xalaal oo wakhtigeeda dhacda loo helo in diiwaangalin madani ah oo dhaxal gal ah la sameeyaa.

13. **Md. Cali X. Maxamed Muuse:-** shir-gudoon iyo mudanayaalba waxaan idinku salaamayaa ASC, waxaa maalmahanba ina horyaaley xeer aad u muhiima oo qaranka muhiimad ugu fadhiya oo u baahan in aad looga baaraan dego, waxaan marka hore aad u soo dhoweynaa shirkii ay yeesheen xisbiyada qaranku shaley oo runtii sii fiican shacabka Somaliland si wanaagan u bogaadiyeen, markaa aad baan ugu mahadnaqayaa dadkii ka qeyb-galey.

14. **Md. Maxamuud Dhunkaal Guutaale:-** Bismilaahi, inyar baan ka horeysiinayaa inta aanan Xeerka u galin, 3 arrimood oo yar yar baan ka horeysiinayaa, Xildhibaanada, Asxaabta Qaranka iyo Xukuumada midba waxbaan leeyahay, Xildhibaanada waxaan leeyahay shaqada kaliya ee aynu leenahay waa sameynta Xeerarka maalin walba Xeerarka aynu sameyno wax ka muuqda qabyo badan, Xeerkan aynu iminka hayno ee Diiwaangalinta Codbixiyayaasha waa markii 5aad ee kaabis iyo wax k a badal lagu sameeyo, waxaan leeyahay xeerar badan oo muhiima maqnaashohoodu dhib ku keenayo dadka iyo dalka ayaa jira inta uu gacanta inoogu jiro oo masuuliyada qaranka la idiin igmadey ah ka fiirsada, shaqada kaliya ee aad leedihiin waa inaad dalka sharciyo u dajisaan, sharci hagaagsan u dejisaan, mid Somaliland intey jirto anfaca inuu inaga soo baxo.

    Axsaabta waxaan leeyahay xeer-dejiyayaal ma tihidin, ha u daayaan shuruucda dalka cdii loo igmadey, raga halkan jooga waa siyaasiyiin, waa rag idinla mid ah, waa rag iyaguba xeerarkan ay sameynayaan loo sameyn maayo dhowr qof, ninwaliba isaga ayaa sameysanaya, markaa axsaabtana waxaan leeyahay iyaguna ha ku ekaadaan axsaabtooda.

    Xukuumada Xeerarka dabiqidiisa iyo fulintiisa markaad leedihiin labadaas leedihiin, markaad curineysaa waxaad curineysaan ee Golaha u soo gudbineysaan wax dhiman iyo wixii khalad ku jiraba idinkuna ka fiirsada, la-

taliyayaal sharci bay xukuumadu leedahay oo ku qaata mushahar marka xeerarka ay ka shaqeynayaan, wax badan oo shuruucda khaladaadleh badan oo iska hor-imanaya sharciyadii soo jireyna ka hor-imanaya ayaa iyaguna jira, markaa aqoontiina iyo idinkaba ceeb bay idinku keenaysaa, intaasi waa dar-daaran.

Waxaan guda-galayaa dooda, in badan ragii iga horeeyay qaatey, magaca Xeerka oo siduu inoogu yimi ee u qornaa aanu aheyn xeer jira, laakiin xeerka jiraa waa diiwaangalinta codbixiyayaasha, xeerka diiwaangalinta madaniga ahi ma jirin, waa xeer hada la soo curiyay oo lagu kaabayo sida gudidu ku soo gudbisey Xeerka diiwaangalinta codbixiyayaasha, isaga magaca waxaan ku taageersanahay in la saxo, markaa qodobkaa sidaas ayaan ugu taageerayaa qoladii iga horeysay.

Xeerka Diiwaangalinta muwaadiniintu ee aynu sameyneyno wuxuu u baahan yahay in si hufan oo aan laheyn xag-xagasho ama cid inoo dhoweynaya ama xisbi inoo dhoweynaya aan la soo sameyn ee loo sameeyo Xeer Qaran oo umada kawada dhaxeynaya, hadii kale xeer xisbi ama cid buu noqonayaa, waa in xeerka sameynaa noqda mid umada anfaca oo wixii khaladaad ee ku jira aynu ka saarno wixii aynu ku kordhineyno aynu ku kordhino isaga Xeerka Diiwaangalinta Codbixinta oo midna kaabis aynu ku sameyneyno midna hada xukuumadu soo curisey.

Qodobka kale, Xeerka Diiwaangalinta Madaniga ah ee la inoo soo gudbiyay waxay iska hor-imanayaan Xeerar hore oo jirey waxaana haboon xeerka marka la soo sameynayo in lala akhriyo xeerarka kale ee dalka ka jira, waayo hadii xeer kale ka hor-imanayo ama qodob ka mid ahi ka hor-imanayo labadii xeer ma wada shaqeyn karayaan, waxaa ka mid ah xeerarka ay ka iska hor-imanayaa Xeerkii Gobolada iyo Degmooyinka ee Golahani ansixiyay Xeer Lr. 23, Xeerkaa Qodobkiisa 68aad Farqada 18aad Xarafka "D" ee ah xilka Gudidda arrimaha Bulshada wuxuu sheegayaa Xilka Gudidda Arrimaha Bulshada ee Dawladaha Hoose iyadaa ayaa leh Diiwaangalinta Muwaadiniinta ah iyo tira-koobka dadweynaha, markaa Xeerkaas oo jira oo inaga inaga baxay hadeynu maanta sameyno xeer kale oo ka hor-imanaya waa ceebaha inaga inagu soo noqonaya, markaa waxaan soo jeedinayaa waa in loo daayo Xeerka sidaan hore ugu ansixiney ee dawladaha hoose ku ansixiney.

Tusaale ahaan, inaga markii la ina soo dooranayay shuruudaha waxaa la inagu xidhayay qofku inuu muwaadin yahey, waxaan ka soo qaadaney kaadhkii aqoonsiga Dawlahada Hoose, inana waxaynu Xeerka ku sameynay oo ku cad waa xilka Dawladaha Hoose waliba ay leedahay Gudidda Arrimaha Bulshada, waa in la is waafajiyo labada Xeer kan maanta aynu sameynayno iyo

kan hore u jirey, anigu hadeynu leenahay kii hore aynu sameynay aynu laalno, hadii kale waa in labada Xeer la isla akhriyaa oo la iswaafajiyaa.

Kaadhka Codbixinta ee maalinta doorashada la galayo yaa xaq u leh, waxaa la yidhi waxaa la siin karaa qof muwaadin oo sita kaadhka Madaniga ah, anigu waxaan leeyahay in laga dhigo **“kaadhka codbixinta waxaa la siin karaa qof kast oo buuxiya Shuruudaha uu qeexayo Xeerka Jinsiyadu ee Xeer Lr. 22/2002”** kaasna waa nusqaan hadaan la waafajin, **Qodobka 25aad** ee iminka lagu soo kordhiyay faqrada iyo Xeerka jinsiyada, labadaasina wuxuu doonayaa in la iswaafajiyo.

Wasiirku maalintii aynu u yeedhney wuxuu inoo sheegay inay ka dhaceyso 200 oo goobood dalka oo dhan, 200 ee Goobood Xeerkan kuma hayo oo kuma taal, Xeerar hore u jireyna kuma heyno, Xeerarka hore waxay dhigayaan Goob kasta oo codbixineed waxay noqoneysaa Goob Diiwaangalineed, waxaan leeyahay soo jeedinayaa mar hadii goobahaa aan golaha la horkeenin xeer hore oo sheegayaana jirin in aynu ku saleyno diiwaangalinta, hadii la doonayo in si sugan u dhacdo Diiwaangalinta madanigu ama dawladaha hoose ha la siiyo ama dawladaha dhexeba ha qaadatee in lagu saleeyo Goobihii Doorashada Codbixinta, waayo 200 oo goobood inama anfaceyso diiwaangalina dhicimeyso, dalka qaar baaney gaadiidba jirin oo telephoneba jirin, xaqna waxay u leeyihiin inay qaataan kaadhka iyo inay wax doortaan lana doorto, ragii halkan fadhiya qaar baa doonaya iney soo noqdaan, dadkaad codka ka dooneysaana waxa weeye kuwa maanta loo sameynayo kaadhadhka, hadii aaney goobihii ay ka qaadan lahaayeen kaadhadhka codka iyo kuwii sugayay dhalashadooda aan la sameyn, markaa Goobahaa uu sheegay Wasiirku maaha kuwo dhaqaya dadka iyo dalka maanta.

Waxa kale wasiirku inoo sheegay maalintii dhoweyd in la shaqo-galiyay dhamaan shaqaalihii diiwaangalinta, in la keenay agabkii diiwaangalinta, in la kireeyay agabkii diiwaangalinta, in la isticmaaley lacagtii loogu talo-galey hawshaa in lagu qabto, waxa weeye sharciga iyo shaqada waxaa horeeya sharciga xildhibaanow, iyadoo aan sharcigii lagu shaqeynayay aan la ansixin yaa u baneeyay inuu shaqaale qor, inuu goobo sameeyo, waa wax wasiirku jeebkiisa kala soo baxay oo isagu ku sameystey.

Xeerka waxaa lagu soo dhex-darey shaqaalaha qabanaya hawsha diiwaangalinta shuruudaa lagu soo xulayaa, shuruudihii lama ansixin lamana sugin wakhtigii la soo xulayay gobol iyo degmo walba waa la soo xuley waana la soo dhameeyay, taana waxaan leeyahay waa inuu goluhu xeerka ku cadeeya shuruudaha qofka qabanaaya shaqadaa oo masuulka Diiwaanka Guud ee Qaranka, Masuulka Gobolka iyo masuulka Degmada mid walba wa in xeerka

lagu cadeeya shuruudaha looga baahan yahay ee lagu soo xulayo, waxaa isna ka dhiman Masuulkii goobta waa in lagu daraa faqrad 4aad oo ah “Masuulka Goobta”, waxaan leeyahay wasiirku hawl aaney wakhtigeedii ayuu fuliyay waana sharci dumis iyo gaf uu qaranka ka galey, taasna waa in lagula xisaabtamaa.

**Qodobka 6aad** wuxuu leeyahay wakhtiga la furayo diiwaangalinta codbixiyayaasha, waxa furaya gudidda doorashooyinka qaranka, waxaad ogtihiin mudanayaal diiwaangalintii hore ee lagu galey doorashada goleheenan ayaa laaley, markii la laaley, waxaynu hadana ansixiney wakhtiga la furayo diiwaangalinta codbixiyayaasha ee dambe, waxaa furaya Komishanka doorashooyinka qaranka, inagaa kan ansixiney kii horena laalney, anigu ma hayo dhawaaq iyo codsi midna oo ka yimi komishankii aynu inagu xilkaa u ansixiney, laakiin waxaa inoo soo furey Wasiirka arrimaha gudaha, kaasna xeerkaa hore 37aad ee laalney qodobadii lagu kordhiyay ee wax ka badalka iyo kaabista ayay ku jirtaa, hadii dee la odhanayo kaana waa la laalayaa oo waxaa furaya Wasiirka Arrimaha Gudaha, taasina xildhibaanow ha laga fiirsado dee sidii laga yeelayo Golaha ayay u taal.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- In dhamaan Xeerarka doorashooyinka, xeerka Diiwaangalinta codbixiyayaasha, Xeerka Gobolada iyo Degmooyinka iyo Xeerka Jinsiyada lala akhriyo dhamaan oo qodobadaa aan sheegay ee iska hor-imanaya iyo kan aynu hadeer sameyneyno la iswaafajiyo oo wakhti la siiyo oo aan lagu deg-degin oo sidii xeerar hore oo aynu sameynay aaney jidka inaga soo noqon oo guurtida ama madaxweynuhu dib inoogu celin, axsaabtuna golaha ha ixtiraameen, inaguna shaqadeena aynu gudano yaan la inoo soo yeedhin wax qof doonayo ama xisbi doonayo.

15. **Md. Maxamed Saalax Cige:-** Shir-gudoonka iyo mudanayaasha Golaha iyo bahda saxaafada waan salaamayaa ASC, marka hore intaanan u galin Xeerka magaciisu yahay qabyo-qoraalka wax ka badalka iyo kaabista Xeerka Diiwaangalinta Muwaadinka iyo Codbixiyayaasha, waxaad moodaa wuxuu ka duulayaa kaabistii iyo wax ka badalkii aynu hore u tilmaamney oo ku taariikheysnaa 14/02/2011 kaas oo ahaa in ka hor doorashada Golaha Wakiilada iyo Madaxtooyada dalka laga sameeyo diiwaangalin cusub oo doorashadaa lagu galo, amendmentkan ama qaabka lagu sameynayo xeerkani wuxuu sal u yahay in doorashadaa Madaxtooyada iyo Golaha Wakiilada lagu qabto.

Iyadoo arrintaa laga duulayo waxaa ina horyaala qabyo-qoraal mashruuc sharci oo ciwaankiisa aan hore u soo sheegay, marka la eego go'aankaa hore iyo marka la eego xeerkan waxaad moodaa in farqi u dhaxeeyo, waxay aheyd in qoraalka inooga imanaya madaxtooyada inuu ku ekaado oo kaliya sidii hore dhaqan inoogu aheyd marka madaxtooyada xeer wax ka badal iyo kaabis lagu sameeynayo in xeerkii hore u jirey lagu sameyn jirey, waxaa ka muuqata Xeerkan inaan wax badan aaney kala soconin xeerka uu wax ka badalka iyo kaabista ku sameynayo, mudanihii hore ayaa sheegay inaynu xeerka laftiisa wax ka badalney qiyaastii ilaa 3 lifaaq baa la socdey xeerkaa, waxay aheyd in Xukuumadu markey xeerkan soo gudbineysay in lifaaqyadiina ay soo raaciso, si aaney xeerkan gudihiisa isugu khilaafin.

Marka labaad, sharci ahaan qabyo-qoraal waxaa la yidhaahdaa xeer cusub oo aan wali dhalan oo markaa la unkayo oo aan wali sharci-dejin marin, halkan xeerka waxaa isku jira laba ciwaan oo la is dhex-galiyay waa qabyo-qoraal oo looga jeedo in Xeerkani gudihiisa uu ku jiro waxaan hore loo abuurin ama xeer aan hore loo abuurin, waana run oo waa xeerka diiwaangalinta muwaadinimada ma heyno meynaan ansixina, waxaynu 2007kii ansixiney xeerka Diiwaangalinta Codbixiyayaasha oo waliba wax ka badal ku sameynay, halkaa waxaa ka cad mudanayaal xeer aan abuurneyn oo xeer cusub oo aan la dhaqan-galin iyo xeer dhaqan-galey oo la ansixiyay oo lumberkii xeer leh la isku soo darey, sharciyada xeerkani ina horyaal dee Calaamatu su'aal baa saaran.

Waxaan marka ugu horeysaba soo jeedinayaa inaaney sharci ku noqneynin amendmentkaa lagu dhex sameynayo waxaan hore u abuurneyn meeley sharciyada kaga taal ama ka galeyso anigu garan maayo, waxaa kaloo xusid mudan in Xeerka Diiwaangalinta Mawaadinmada sidaan idaacada ka dhageystay aan maqley inuu Madaxweynuhu Xeer-nidaamiye ka soo saarey oo baahiyay, markaa Xeerka Muwaadnimadu hadii Xeer madaxweyne ay ku soo baxdey oo la baahiyay maxaa halkan keenay, maxaa xeerkan loogu soo darey, ma xeerkii madaxweynaha ayaan sharci aheyn, ilaa iminka ma cada danta laga leeyahay Xeerka Diiwaangalinta Muwaadinimada.

Waxaa ka muuqata inaanu Xeerkii diiwaangalinta muwaadinimadu aanu halkan ku dhameyn, xeer balaadhan buu ahaa, xeernimadiisiina halkan kuma cada, waxaa kaliya oo ku jira teysaro, markaa anigu ma garanayo sababta looga doodayo ee heshiisyad looga galeyo Xeerkan Muwaadinimada oo aan markiisii horeba aan abuurneyn, xeerkan diiwangalinta oo mar hore la baahiyay, xeerkan diiwaangalinta muwaadinimada oo aan Golayaasha sharci-dejinta soo marin, sababta iminka halkan loogu soo darin ma muuqato, hadii la doonayo inaynu Xeerka iminka dhaqan galino oo dhameystiran halkan lagu

soo daraa oo uu xeerka ku jiraa haba lagu ansixiyo hadii la doonayo eh oo gudidii shaqada ku laheyd inta xeerkii lagu celiyo iyadu xeerkii Muwaadinimada soo sameyso, kana la raaciyo kaadhkii aqoonsiga oo markii horeba Xeerkii Lr. 37 ku jirey oo ahaa, kana la soo dhameystiro.

Haduu Xeerkani sidan inaga baxo oo madaxweyne iyo guurtiba maro dee Xeer teysare weeyaane maaha Xeerkii Diiwaangalitna Muwaadinka, waa Xeer teysaro oo kaliya ah ee wax kale maaha, waxaan soo jeedinayaa in la dhameystiro Xeerka Diiwaangalinta Muwaadinimada oo isagoo dhameystiran halkan la keeno, qodobadii ku jirey ee Kaadhka aqoonsiga ee muwaadinimaa oo markaaba Wasaarada Arrimaha Guduhu laheyd oo aaney wax kale ku jirin dee sidii aheyd ee Xeer lr. 37/2007 ha lagu hagaajiyo oo hadii wax lagu darayo ha lagu kordhiyo.

Marka ugu horeysa ciwaanka sidaas ayaan u kala jabin lahaa, waxaa taas daliil u ah labada shey waxay ku kala macaaban yihiin muwaadinimo iyo codbixin, waxaa qeexay erey-bixinta isla xeerka laftiisa oo codbixiye waxbuu u yaqaaney xeerku muwaadina waxbuu u yaqaaney oo mid wasaarada Arrimaha Gudaha ayaa ka masuul aheyd, midna Komishanka doorashooyinka, wax isa soo dhexgalayaba may aheyn, wayna ku cadahey Xeer lr. 37/2007 qabyo-qoraalkana way u cadey, meel laga dhaafayona anigu garan maayo.

Waxaa sii cadeeyay ujeeddada aad ka tilmaameysaa qodobka 1aad oo kale warqada aqoonsiga ayaa ku cad, dee warqada aqoonsiga iyo Xeerka Diiwaangalinta Muwaadinimadu way kala duwan yihiin qodobka kowaad ayaaba cadeynaya oo qeexaya, markaa dadka yaan tushuush lagu galin kaadhkii muwaadinmada ayaa la diidan yahay, midna lama diidana kana waa inoogu yaal, kii horena wuu ku yaal wax isa soo dhexgaliyay oo iyago laba xeer kala lahaa maxaa inta uu isa soo dhexgaliyay halkan keenay.

**Qodobka 1aad** ee qabyo-qoraalkan waxaa lagu tilmaamey, Xeerkan waxa lagu magacaabayaa Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Diiwaangelinta Muwaadinnimada oo aan aheyn xeer jira, iyo Codbixiyeyaasha oo ah Xeer jira, waa laba arrimood oo kala duwan, markaa waxaan ka saarayaa diiwangalinta muwaadinimada oo waxaan ka dhigayaa **"Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyeyaasha".**

Waxaa aad u sii cadeeyay muwaadinimada iyo shuruudaha lagu noqonayo muwaadin Xeerkii jinsiyada Xeer Lr. 22/2002 mudanihii iga horeeyay ayaan ku raacsanahey oo sheegay waana Xeer Golihii inaga horeeyay uu ansixiyay, Xeerkani wuxuu tixraacayaa Xeerkaas oo muwaadn waxaa loola jeedaa qofkii buuxiyay shuruudaha uu tilmaayo xeerkii Jinsiyada Xeer Lr. 22/2002, markaa

hadii uu tilmaamayo xeerkaasi waxay aheyd in xeerkaas in loo raaco, waxaad arkeysa qodobada Xeerka ku jira waxaa kuu muuqanaya in **Qodobka 3aad** ee Xadka dhaqan-galka Xeerka wuxuu isku darayaa labadii xeer, aniguna laba xeer baan ka dhigey, waxaa laga qaatey qodobkan oo uu ku saxan yahay qodobkii 3aad ee Xeer lr.37/2007 oo ka faah-faahsan qaabka uu u qoran yahay ay ka waafaqsan yahay kana macquulsan, horena u tijaabinay oo hore u dhaqan galey.

**Qodobka 4aad** waxaa isna qeexay sida loo sugayo muwaadinka Xeerka jinsiyada hadeynu xeerkan ku darnona wuxuu laalayaa ama dabrayaa ama nasakhayaa xeerkaa jinsiyada oo ah dhaqal-gal, lagumana cadeyn halkan in lala akhriyi karo Xeerkii jinsiyada, mudanihii iga horeeyay ayaana ku raacsanahey soo jeedintiisii oo ku waafaqsanahey, xeerkani ma asaasayo sugida muwaadinka ee xeerkaa hore ayaa sugaya.

Sidoo kale waxa ka muuqata xeerkan inaanu sugin da'da muwaadinka, da'duna waxay u baahan tahay in la cadeeyo oo la sugo si aan hadhow la isugu khilaafin, waadna arkeysaan oo qodobada dambe ee Xeerkau waxay leeyihiin hadii da'da la isku khilaafo waxaas ayaa la sameynayaa, xeerar kalena way inoogu cadey da'du.

**Qodobka 7aad** ee Xeerkan qabyo-qoraalka ah, qabyo-qoraalku inta hore wuxuu ka hadlayaa diiwaangailnta muwaadinka oo aynu nidhi xeer malaha, wuxuu kaloo sii khilaafsan yahey qodobkani qodobka 2aad ee lifaaqa 2aad ee lifaaqyadii Xeerka 37/2007 raacsanaa, xeerkaas ayayna u baahan tahay in loo raaco lagana qaato wixii halkan ka khuseeya.

**Qodobka 8aad** isna waa la mid waana qodobka muranka u badan wakhtiyada aynu arkeyney uu ka socdo, waa dadka aan laheyn awooda saxiixa iyo qaabka looga qaadayo, waa arrnkii heshiis oo arrinkaasi waa kii ay Xukuumada iyo komishanku inta badan ka shaqeynayeen, inbadan wax laga qabtey oo indhaha loo badaley, halkan kuma cada arrinii heshiiska ee aheyd in arrinkan la sameeyoba, qodobadii ugu muhiimsanaa ee wax ka badalka loo sameeyayna ee keenay duplicateka ama ku noq-noqashada badan uu ku yimi faraha iyo saxiixyadaii oo la badaley oo la controligari waayay, oo keenay in indha laga qaado laga dhigo, markaa xeerkan laguma soo darin, waana in lagu daro xeerka qaab keena inaan lagu cel-celin in la isla qaato, waana shuruudihii la socdaan hadii kii hore la qaadanayo, hadii kan laga heshiiyay ee indhaha la qaadanayo waa in gabi ahaanb qodobkan la badalo sidiisaba, lana keeno kii komishanku soo badaley, soo jeedinteyduna waxay taageersan tahay soo jeedintii komishanka ee aheyd in indhaha la iska qaad, qodobka 9aad isna wuxuu raacayaa qodobkaa hore  indhaha iyo shuruudaha lagu xidhayay.

**Qodobka 12aad** isna sidoo kale waxaad moodaa xeerkan markii la soo diyaarinayay inaan xeer lr.37/2007 lala eegin, waana qodobadii gudidii arrimaha gudaha ee wakhtigaasi wax ka badaleen ayuu ahaa, wuxuuna khilaafsan yahay lifaaqa 2aad qodobkiisa 3aad, markaa waxay u baahan tahay in iska daa Xeer kale oo xeerkan gudihiisu si aanu isu khilaafin, lifaaqii iyo qodobkan la isla eego oo hadal badan oo qodobkaa ku qoran ayaa jira, waana ka xaga hore kaga xusan qodobada la badaley ayuu ka mid yahay saameynta waxaa ku qoran "waxa ka badalkani waxa saameyn ku meelgaadha ah iyo ilaalis ku sameynayaa Qodobada Xeerka Diiwaangalinta ee kala ah 7aad, 8aad, 9aad, 10aad iyo 12aad faqrada 1aad iyo 2aad ee iminka xeerkan ku xusan eek u taala ayuu waliba saameyntu ahaa.

Markaa lifaaqii bay ku cadahey in kaabis iyo wax ka badal la sameeyay, hadii aad akhrido lifaaqana way ku caday inta qeybood ee loo sameeyay iyo inta uu u kala baxayo, waa qodobka 3aad ee lifaaqa oo lagu badaley Qodobka 12aad ee Xeerkan codbixiya, markaa isagu wuxuu u baahan yahay maadaama ay is-khilaafsan yihiin dee in xeerkii laftiisii is khilaafo ayaan meesha ku jirin iyaa meesha ka baxaysa, markaa waa in la soo qaato Lifaaqa oo xeerkan lagu daro hadii taa la qaato weeye.

**Qodobka 14aad** ee dhowrista xogta muwaadinka, waxaa ku xusan damabiyo badan qodobkan kumanaa xusna waxay tahay ciqaabta ka dhalan karta hadii xogtaa qofka la bixiyo ama cid kale loo gudbiyo ama cid dibada ahba loo diro ciqaabta ka dhalan kartaa waxay tahay lama sheegin oo kuma xuan qodobkan, waxaa ku xusan intaas ayaa la ciqaabayaa oo kaliya, markaa taasina waxay u baahan tahay in la xadido.

**Qodobka 16aad** ee diiwaangalinta Muwaadinimada, waxaa kala duwan diiwaanglinta muwaadinimada iyo sugitaankeeda, qodobada hore ayaa lagu soo tilmaamey meesha iyo qaabka loo sugayo muwaadinka waa xeerka Jinsiyada oo isagu sugay muwaadinimada, xeerkaa Jinsiyada ee sugay muwaadinimada. Waa in loo sugo muwaadinimada si waafaqsan Xeerka Jinsiyada, Diiwaangalintuna markaas ayay imaneysaa oo halkaas ayay raaceysaa.

Sugitaanka muwaadinka iyo **Qodobka 17aad** iyo **Qodobka 18aad F/4aad** ayaa iyaguna isku mid ah, waxaa iyana su'aal badan laga keenay muwaadinimada qofka caaqil baa xaqiijinaya oo muwaadinimadii qofka waxaa lagu xidhay caaqil oo ah caqliga nin kaliya, taasina waxay u eegtahey mid aan suurtagal aheyn, caaqilkeygii ceergaabo joogaaye ma ceergaabo inta laga soo qaado baa halkan la iigu keenayaa, kan suuqa jooga xagee lagu sugaya, ma caaqiladeynu badasnaa, taasi maaha wax macquula, waxaan aaminsanahey oo aan soo jeedinayaa inaanu qodobkaasi suurtagal aheyn, markaa sugitaanka iyo

shuruudaha uu ku xidhay Xeerka Jinsiyadu Mudanihii iga horeeyay ayaa sheegay oo aan ku raacsaneheye oo kaliya ayaa u baahan in Xeerkan loo soo minguuriyo oo lagu xidho, xal qof oo ka mid ah ayuu ahaa hadaad caaqilku xeerka jinsiyada eegto laakiin dadkale iyo shuruudo kale ayaa ku xidhan, markaa arrintaana sidaas in loo qaato ayaan soo jeedin lahaa.

**Qodobka 18aad** isna duplicate baa la sameeyay oo lagu soo cel-celiyay waxaan soo jeedinayaa in qodobkaa hore aan u soo sheegay ee Xeerka Jinsiayda in lala akhriyo oo aanu soo noq-noqon sida f/4aad ee qodobkan.

**Qodobka 24aad** waxaana aragtideydu tahey isna inuu ka hor-imanayo Xeerka Jinsiyada, Xeerka Jinsiyada ayaa cadeeya waxa wasaaradu cadeyneyso ee Warqada aqoonsigu tahey, jinsiyada muwaadinimada iyo kaadhka aqoonsigu way kala duwan yihiin, jinsiyada iyo qaabka loo cadeynayo dee Xeer baa tilmaamey, Wasaaradu waxay leedahay oo kaliya kaadhka aqoonsiga hadey markaa Dawlada hoose u wakiilaneyso iyo hadey iyadu qabaneysoba, laakiin arrinkaa kale ee Qodobkani Xeerkaas ayuu ka hor-imanayaa, markaa dhowr qodob oo ilaa 5 qodob ah iyo waxaa is dabraya Xeerkaa Jinsiyada, waan ku taageersanahey mudanihii hore ee sidaa u tilmaamey.

**Qodobka 25aad** waa qodobka ugu muranka badnaa uguna hawsha badnaa, marka horeba wuxuu ku cadaa Qodobka 7aad ee Law lr 37 oo isagoo inta ka faah-faahsan ayuu ku jirey, wuxuuna shardi ku noqdey diiwaangalintii codbixiyayaasha, halka ay markii hore ka aheyd waxaan iyagu is dabreyn ee is dhameystiraya kaadhkii codbixinta iyo kaadhkii muwaadinimada wax muran iyo khal-khal ah oo markii lawada qaadaneyay qodobka 7aad ee xeerkaasi shaqeynayay muu jarin, iminka dabar la iskaga dhigey ayuu muranka iyo dabarku yimi, iminka inkastoo heshiis ka yimi oo heshiis laga galey anigoon heshiiska waxba ka badalin laakiin aragtideydu.

Waxay aheyd in madaama Qodobkaa 7aad uu hore inoogu dhaqan galey in qodobkaa hore la qaato bay aheyd oo hawl-wadeenada iyo qaabka uu u qornaa in isaga la qaato bay aheyd marka horeba, laakiin iminka heshiiska baa ka yimi si aan muran dambe u imana waxaan taageereynaa in Qodobkaasi noqdo laba faqradood oo mid tahay sida halkan ku qoran, midna tan warqada Madaxweynuhu inoo soo gudbiyay ee lagu heshiiyay ku qoran tahay oo faqrad labaad looga dhigo, inkastoo ay adagtahey sugitaankii muwadinimada la siiyo qof kaliya oo wasaarada ka socda, halka qodobkii hore wakiilo u joogeen Xisbiyada oo muraaqib wakiilo u ahaa, iyagoo wada saxiixay baana kaadhka la siinayay, laakiin halkan waxaa lagu soo qorey in Wasaarada Arrimaha Gudaha, arrintaasina dhibaatadeeda ayay yeelan doontaa, anigu waana ka digayaa koley oo waa in dad kale oo la sugaya ay goobta la joogtaa.

Waxaa kale oo isna qodobka isla bad-badalmi doonaa Xeerka intiisa badan, waayo madaama oo kaadhkii aqoonsiga la tilmaamey meelkasta oo ay kaga jirto Diiwaangalinta Muwaadinimadu dee waa laga saarayaa, waayo kaadh aqoonsi baynu ka hadleynaa markaa, waxa lagu heshiiyayna waa kaadhka aqoonsiga, marka si aan khilaaf sharci aanu u iman meelkasta oo **Diiwaangalinta Muwaadinimadu** kaga jirto waa laga saarayaa oo waxaa lagu badalayaa **kaadhka aqoonsiga**.

**Qodobka 29aad** dhaqan-galinta diiwaangalinta codbixiyayaasha, Gudiddu way soo qortey, waxaadna moodaa inaaney aad u cadeyn waxaa la yidhi "ugu yaraan lix bilood ka hor maalinta doorashada" markaa anigu waxaan ka badalin lahaa mudada ugu yari inay intaa uun noqoto, meelaha ay kaga qoran tahay tusaale ahaan **Qodobka 32aad** oo kale warqada aqoonsiga muwaadinka aya ku sax tahay in xeerka gabi-giisaba lagu badalo.

**Qodobka 35aad F/1aad** waxaan raacin lahaa in marka muwaadinimada la tilmaamayona inay cid u joogta Xisbiyada sidaas oo kale ayaan qodobkaa u raacin lahaa mar hadii xaganba cid u joogto, waxaa jira iyaduna marka halkan laga hadlayo cabashada, marksta oo diiwaanglinta codbixiyayaashu ay jirto oo doorasho ay soo socota, cabashooyinka ugu badani goobahaey ka yimaadaan, xisbiyada dhibaatooyinka ugu badan ee ku dhaca goobaha ayaa ugu badan, halkan wakiilada Xisbiyadu way diiwaangalin karaan wixii cabasho ah ee arrimahaas ku saabsan kana dhaca goobta, markaa wakiilada Xisbiyadu xagey u gudbinayaa cabashada, ma iyaguun baa sidanaya, markey cabashadaasi tahey mid macquul ah, ma maxkamadey u gudbinayaan, ma xisbiyadooda ayay kula soo noqonayaan? Komishku muxuu soo saari doonaa hadii cabashadaasi macquul noqoto? Waxaas oo dhan halkan xeerka kuma cada.

**Qodobka 38aad F/2aad** waxay tilmaameysaa komishanka doorashooyinka qaranka waxaa waajib ku ah Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo Xisbiyada Siyaasadu inuu siiyo liiska codbixiyayaasha ah ee kama dambeysta ah, xaga hore waxaan ku soo cadeyney in muwaadiniinta diiwaangalin lagu sameynayo, diiwaangalintii wasaarada arrimaha gudaha ayaa leh, hadii muran ka yimaado xagee xisbiyada qaranku ka doonayaan muwadinimadii dadkii u codeynayay maba hayaane umana diiwaangareysna, markaa waxaan anigu soo jeedin lahaa in qodobkan lagu daro in loo siiyo fursad diiwaanka madaniga ah ee Wasaarada Arrimaha Guduhu hayaan ay xaq u yeelan karaan inay markey u baahdaan arki karaan.

**Qodobka 42aad** wuxuu ku saabsan yahay Ciqaabaha, khaladka Diiwaangalinta Madaniga ah ka dhaca ee Wasaaradu sameyso sharci maaha in qof muwaadin ah xaqiisii codbixineed laga joojiyo taas oo dastuurku xaq u siisay oo u

jideeyay, markaa anigu waxaan ka saari lahaa **F/2aad** waayo waxay hor istaageysaa xaqiisa codbixineed qofka, ciqaabta dambiga uu galo iyadu waa meesheeda, haduu goobta dambi ku galo dee ciqaabta la marinayo waa meesheeda, laakiin xaqii inuu codkiisa bixiyo wuu dhiiban karaa, wixii dambi lagu helona waa la marinayaa, sidaa darteed **waxaan soo jeedinayaa anigu in F/2aad laga saaro qodobkan.**

Meelihii ay aheyd in ganaaxyada lagu badiyo ee qofku markuu dambi galo waa la khafiifiyay ciqaabaha, meelo aan culeys aheyn culeys baa la saarey, marka waxaan odhan lahaa tusaale ahaan qofka qoraal been abuur ah la yimaada waa dambi weyn Xeerka Ciqaabta Guudna dambi weyn buu ugu qoran yahay, 3 sano ayaa lagu soo koobey halkey xeerka ciqaabta 6 sano ka aheyd, waayo qaranka ayaa dhibane ah oo dambi weyn, wixii been abuur la yimaada in sida Xeerka Ciqaabta Guud dhigayo in halkan loogu soo guuriyo ayaan soo jeedin lahaa.

**Qodobka 45aad** ee nasakhaada mudanihii iga horeeyayna ka Hadley hadeynu sidaa ku qaadano dee xeerar bay iska hor-imanayaan, iska dee Xeer hore eh Xeerkan laftiisa ayuu lifaaqyadiisa ka hor-imanayaa, markaa isaga hadii la yidhaahdo Xeerkani wuxuu nasakhayaa ama burinayaa dhamaan Xeerarka ka hor-imanaya Xeerkan, iyada lafteedu dhibaato ayay keenaysa, si ay nasakhaadani u timaado waa in Xeerarkii kale la keeno oo markaa xeerkan lagu guuriyo, laakiin nuxurkii xeerkan haduu xeer kale ku qoran yahay ma nasakhi karo oo waxaa la raacayaa xeerka kale, markaa intaynaan ansixin qodobkaa nasakhaada oo hadhow muran keeni doona, iminkaba inaynu xeerarka la tilmaamno oo la akhrino xeerkan, dabadeedna Xeerkii oo dhameystiran aynu markaa waajibkeena sharci ka gudano.

**Guntii iyo gunaanadkii waxaan soo jeedinayaa:-**

- In Xeerkan uu mad-madow badani ku jiro, ma jiro qodob xeerkan ka mid ah oo aan Xeer kale taabaneyn, qodob Xeerkan ka mid ah oo aan Xeerkii iyo lifaaqyadiisii hore taabaneyn, suurtagal maaha in isagoo qaabkan candadawlka ah u dhigan inaynu ansixino, markaa Xeerkan intan in ka badan in la eego oo waliba gudi loo diro soo habeysa oo xeerarkii kalena ku soo lifaaqna, tan madaxweynaha ee la inoo keenayna ku soo darta, Xeerkaas oo dhameystiran markaa aynu u codeyno, doorashooyinkiina lagu galo, wa bilaahi tawfiiq.

16. **Md. Xuseen Ismaaciil Yusuf:-** dhamaan waan salamayaa dhamaan shirgudoonka iyo xildhibaanadaba , waxaab is kortaagayaa qodobo ka mid ah xeerka, masalan Qodobka 10aad waxaa uu leeyahay sidan:- Magaca muwaadinka waa in lagu qoro xuruuf la isla wada sar-gooyey; waana in aanay kala duwanaanin. Ma waxaa loo jeedaa halaga dhigo xuruuf waa wayn capital letters.

    **Qodobka 12aad farqadiisa 2aad** Halka ay ku taalo kalmada nasakhaadea waxaan ku badali lahaa wuu burayaa sidoo kale halka qofka damaanadiisa waxaa qaadaya la yidhi caaqi ee la soo koobay waxaan ku dari lahaa Suldaan, xildhibaan, iyo sheikh caana lagu soo daro ayaan soo jeedin lahaa

    Qodobka 26aad farqadiisa 3aad waxa ay sheegaysaa Diwaangalinta codbxiyayaasha laguma xidhi karo lacag lagu bixinaayo ama shuruud kale oo lacageed ama kharash gelinaaya codbixiyaha. Markaa waxaa aan leeyahay hadii uu qofku ka habsaamo diwaan galinta marka danbe malacag ayaa laga qaadayaa waa in halkaa la hubiyaa.

    Waxaa kale oo aan raacsanahay soo jeedintii gudidda ku shaqada lahayd xeerkan ee Qodobka 25aad ee ahaa dib haloo qoro, waana in lagu daraa soo jeedinta madaxweynaha ee cadaysay in aanay labadu isku xidhmi karin labada diwaan galinood, hana lagu daro isha la sawirayo iyo faraha waa lagu guulaysan karaa taa 100%.

    Waxaan soo jeedinayaa:- waan haysanaa wakhri inagu filan oo ay doorashadu ku qabsoomi karto sidaa awgeed in doorashooyinkan is wada barkan in mar lawada qabto waayo waxaa wadanka ka jira taxarukaad siyaasiya waana mid aad loo sugayo waanan ka baxay.

17. **Md. Siciid Cartan Cusmaan:-** doodani waa mid aad u soo daashay oo nuxurkeedii horaa loo yidhi, doodauda waxaan ku bilaabayaa heshiiskaa marka hore waan soo dhawaynayaa hasayeeshee heshiisyadii laga hadlayay ee media lagu qoray hadana hal baaragaraaf la dhicay wax umada u qalma maahan ayaan leeyahay.

    Dalkeena waxaa ka dhacay doorashooyin waxaana wanaagsan in aan wax ka barano taariikhda waayo doorashooyinkeeni waxaa ku jiray qaladaad badan,

laakiin waxaan samaynaynay waxaa uu ahaa xal, xalna marwalba lagu jiri maayo ee waa in wax la saxaa.

Hadaba anigu waxaan qabaa in xeerka diwaan galintu uu yahay kii lagu xakamayn lahaa dhibaatooyinka aan ku soo aragnay doorashooyinkii ina soo maray. Waxaa kale oo aan qabaa in uu helo agab ku filan iyo goobo ku filan intaba in uu helo.

Xeerkani dhibaatada uu leeyahay waxaa la mid ah in la yidhi lababoqol oo goobood ayaa Somaliland oo dhan loogu talo galay waanad haysaan buuqa iyo qayladii ugu horaysayna midaasina mid macquul ah maahan tusaale ahaan gobolka Saaxil waa 15 goobood gobolada kalna waa sidaa iyo mid la mid ah waxaanan qabaa in ay buuqbadan keeni doonaan hadaa sidaa wax laga badalin waxanan leeyahay dib ha loogu noqdo dalka kuma filno goobahaasiye ama ha loo daayo goobohihii duwaan galinihii hore ka dheen dalka qodobada kalana sidooda ayaan u qaadanayaa waanan ka baxay

18. **Cabdiqaadir Jibriil Tukaale:-** marka hore waxaan salmayaa shirgudoonka sharafta leh iyo xidhibaanadaba iyo saxaafadaba. Maadaama aan nahay golihii xeer dajinta in aan nidaamino xeerka waxaanan qabaa in laba xeer oo kala madax banaan kalana u jeedo ah ayay noqon lahaayeen oo sidan mid walba loo eeyay ayay noqon lahaayeen.

marka laga hadlaayo duwaan galinta muwaadinka waxaa loo baahan yahay wax aad looga shaqeeyay run ahaantiina ma garanayo barnaamidka sida looga soo shaqeeeyay waxaanad moodaa in ay waxbadani kamaqanyihiin. **Waxaanan soo jeedin lahaa** in xeerka laba loo kala jabiyo ayaan soo jeedin lahaa mid walbana sidiisa looga shaqeeyaa, waxaanad moodaa xeerkani in uu inagu soo galay si qabqab ah.

Wanan leeyahay marka aan wax ka shaqaynayno in aan si wanaagsan uga shaqayno ayaa jecelahay oo wax tayo leh aan soo saarno marka aad eegto diwaan galintu waxay koobsataa waxyaabo badan, sidaa awgeed waxaa is barkan kii diwaan galinta iyo codbixiyayaasha, markaa waxaa loo baahan yahay in aad qodob qodob loogu eego oo tusaale ahaan qodobkii la isku haystay ee hadana la is la qaatay maxaa damaanada ah mar hadii Wasaarada Arimaha Guduhu iska maamulanayso.

Waxaan soo jeedinayaa in la kala guro Qodobada is barkan isla markaana qodob walba halkiisa loogu tago oo ay kala madax banaanaadaan labadani diwaan galinta iyo codbixiyayaashu, waxaanan leeyahay yaynaan sidan ku

ansixin waayo waan ku ceeboobaynaa hadii uu sidaa inaga boxo, waxanan soo jeedin lahaa in su hufan oo aan la is ficishanayn looga
Shaqeeyo oo qaranimo leh lagana dhigo laba xeer oo kala madax banaan halaga dhigo oo faa'iido u leh muwaadiniinta waanad mahad santihiin.

19. **Md. Ibraahin Caraale Cabdi:-** shirgudoonka iyo xildhibaanadaba waansalaamayaa mar labaadka waxaan u mahad naqayaa xukuumada xeerka soo saartay iyada oo ka taxadiraysa in doorashadu dib u dhacdo kuna dadaalaysa in wakhtiga laga faa'iidaysto.

Waxaanan doodayda ku bilaabayaa aniga oo ugu horayn soo dhawaynaya hoshiiska uu Madaxweynaha JSL isaga oo ka duulaya tixgalinaya tabashadii iyo codsigii ee labada  xisbi ee mucaaradka ah ka dib markii ay qaylo isku dareen isaga oo arinkaa hoos u eeyaga arinkaa madaxweynaha aad ayaan ugu mahadinaynaa.

Qodobkaa la soo gudbiayayna sida loo soo gudbiyay ayaan ku taageersanahay isaga oo ay xibiyada mucaaradkiina ay ku qanceen, waxaana is dultaagayaa heshiiska iyada oo ay jirtay in xisbiyada mucaaridka ahi ay qaadeceen doorasha oo qaylo dhaantu aad u badnayd waxaana filayay qof kasta oo dhagaystayna uu filayay qaylo oo dhaantaa ka soo baxda waayo Awrka layliga ahi waxaa uu ka didaa waxyaabaha lagu raro waxaan odhan karaa xisbiyada mucaaridka ahi waxay ka dhican yihiin Awrkaas oo kale waayo waxay ka qaylinayeen oo ay wax ka badaleen nooma muuqato shacabkana uma muuqato.

Oo waxa ay diidanayaayeen doorashada hadana waxay aqbaleey oo hashiis ku galeen in si wanaagsan oo mug leh la isku diwaan galiyo waaba laba aan is qaban waxaanan u soo jeedinayaa masuuliyiinta xisbiyada ee golaha fadhiya in ay ilaaliyaan masuuliyada qaranka inaga saaran oo aan dhawrno oo ayaynaan umada been u sheegin.

Waxaa kale oo aan ku darayaa qobyo qoraalkani waa mid aad u muhiim ah sida aan hore u sheegnay qaybtiisa diwaan galintu waa xeer u adeeya Qaranimada waana mid u adeehaya aayeheena halka ka kale uu u adeegayo doorashada waxaanu qeexayaa in ay dhacdo doorasho xor iyo xalaal ahi

Waana xeer cadaynaya yaa noqonkara cod bixiye waaypo qofka muwaadinka ah ayaa codeeyaa markaa hadii aan muwadinkiiba lacadayn waayo waxaa jooga dadbadan oo aan isku midab nahay isku afnahay sidaa darteed xukuumada ayay waa jibku tahay in ay cadayso ayaa muwaadin ah aad iyo

aad ayayna ugu mahadsanyihiin in ay soo qadimaan oo ay soo dhigaan xeerkan si loo cadeeyo muwaadinka dhanta ah ee wadanka jooga loona cadeeyo si uu u codeey si ay u dhacdo doorasho xor oo xalaal ahi.

Waxaan is dultaagayaa Qodobada lalahaa qaladaad ayaan ku jira laakiin uu ka hufan yahay waxyaabahaa la sheegayay mida ugu horaysa Golaha waxaa uu ku soo galay sifo sax ah, waayo waxaan ognahay in aanay komishanka doorashooyinku aanay si toosa Golaga xeer u keenin ee waxay u keenaan Xukuumada oo soo eegta oo golaha wasiirada ayaa soo ansiya sidaa ayuuna inaga inagu soo gaadhaa.

Waxaanan maqlayay dad lahaa maaha xeerkii komishanku keenay waayo xukuumadu wax ayay kasoo badashaa sida aan inaguba wixii aan ku munaasib ka ahayn aan uga badalno oo haduu xaqu leeyahay in uu komishanku wax inoo soo gudbin karo wuu keeni lahaa waxaa uu soo mariayay hay’adii xaqa u lahayd oo iyaguna ay sida shaqciga ah inoo soo gudbiyeen,

Qodob kale ayaa jira oo ay ragbadani ku doodanayaan xeerkan magiciisu waa Qabyo-qoraalka Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Diiwaangelinta Muwaadinnimada iyo Codbixiyayaasha waxaanay leeyihiin waa laba xeer oo la isu daray mid la curinayo iyo mid wax laga badalayo waa mida hore e xeerku afsoomaali ayuu ku qoranyahay ee English kuma qorna oo labada kalmadood ee **kaabis iyo wax –ka badal** laba micno oo kala duwan ayay leeyihiin sidaa awgeed kaabis ayaa meesha ku taalo oo xeerkii hore ayaa kan lagu kaabay oo xeerka codbixiyayaasha ayaa lagu kaabay sida idinka muuqata xeerka waxaanan leeyahay xeer jira waxna waa laga badali karaa waana l akaabi karaa.

Sida dad badani ka dhawaajiyeen qaranka hawsha diwaan galinta waxaa u haysa oo ay u igmatay waa wasaarada Arimaha Gudaha, komishankuna waxay ka soo dhexbaxayaa waa qaran oo dad aqoonyahano ayay ig
Manayaan labadubana qaran ka ayay ka mid yihiin kamana maarano in aan helno dad muwaadiniin ah oo dalkan u dhashay oo bari cod bixya waxman leeyahay waar yay naan arimaha meel ayna ku jirin ka dayin.

Waxaa kale oo aan saxayaa waxaa in badan la soo jeediyay golaha dhexdiisa in aanu xeerkani ahayn xeerkii dorashooyin oo uu inoo danbeeyo xeerkii doorashooyinku, ragbadan ayeen in lagu cadeeyaa waxay soo jeediyeen in lagu cadeeyo doorashada 26 juun, waxaan mudanayaasha xasuusinayaa qodobka 42aad iyo Qodobka 83aad ee dastuurka JSL ayaa cadaynay mudad xilka iyo wakhtiga doorashada ee Golha wakiilada iyo Madaxtooyada qodobka 42aad

ayaa cadaynaya in wakhtigoodu yahay 5sandood. Qodobka 83aad na isaga ayaa cadaynaya in wakhtiga madaxweynuhuna yahay 5sanadood isla qodobadaa waxaa faqradohooda kamid ah hadii ay dhici weydo oo ay qabsoomi waydo doorashadu cida xaqa u leh kordhinta doorashada.

Naga oo xukuumada ku amaanayna in ay doorashad xiligeeda ku wado in ay dhacdo oo misaaniyadiina soo diyaarisay xeerkana inoo keentay ayaa hadana wax walba waa dhici karaane waxaa taas cadeeyay Dastuurkeena sida wax la odhanayo.

Waxaanan shacabka xasuusinayaa in miisaaniyada Golaha taala ay ku jirto misaaniyadii loogu talo galay in lagu qabto Doorashada Golaha wakiilada iyo ta Madaxtooyaduba xiligeediina ay dhacayso, waxaa nasiib daro ah in uu xeerkani Golaha yaalay mudo laba bilood ah oo ay haysay Gudida arimaha gudaha ee galaha wakiiladu,

Qodobka kale ee aan raacinayaa waxaa weeyi tirada gooba oo ragbadani ka hadleen iyada oo lahu xisaabtamaayo Kharashka iyo wakhtiga loo jideeyay waxaana loogu talo galay in ay socoto mudo 3 bilood ah, hadii ay ku qabsoomi waydo waata aan Qodobka ku darnay. oo 200 oo goobood ma yara mar hadii ay soconaysa 90 maalmood wayna ku filan tahay goobuhun meel maahee way guur guurayaa oo muwaadin walba gurigigiisa ayaa loogu gaynayaa.

Komishanka doorashooyinka qaranka u ma samayno goobaha ee iyaga ayaa samaysta oo hadba sida ugu macquulsan ee wax ku soconayaa ayaa ay u dhigaan sidoo kale waxaan leeyahay wasaarada Arimaha gudaha iyadaa hawsha gacanta ku haysa ee iyana u yeedhin mayno sida ay hawsha u qabanayso oo hadii ay u arkaan in goobahaasi yaryihiin iyagaa kordhinaya laakiin in aan inagu u jeedino oo laba boqol lagama dhigi karo aan nidhaa maahan.

Waxaan iyana wax ku darayaa Qodobka 17aad ee xeerka oo cadynaya sugi taan ku muwaadinka iyo qaabkaloo sugaayo muwaadinka, qodobkaas Farqadiisa 1aad cida qofka cadaynaya waxaa cadaynaya caaqil waxaan kudarayaa xildhibaanada Baarlamaanka, xildhibaanada golayaasha deegaanka, salaadiinta iyo odayaasha caanka ee JSL.

Waxaa kale ee aan is dul taagaya duwaan galinta dhacaysa 3 bilood ee December ka horaysa iyo 3 bilood ee ka danbeeya sida loo xaqiijinayo muwaadinka waa sida uu sheegayo qodobka 17aad ee xeerkani hadhawna lama fudaydin karo hadhawna lama fudaydin karo.

Waxaan leeyahay xisbiyada mucaaridka ahi waa in ay usheegaan dadkooda in ay is diwaan galiyaan waayo hadii ay is diwaan galinwaayayaan waxay dabraysaa waa doorasha waayo muwaadinka waa la hubinaya oo caaqilka waa la dhaarinayaaye oo iyaga ayaa u sobob ah taasna.

**Waxaan soo jeedinayaa**

- in xeerkan la ansixiyo laguna ansixyo lifaaqa ay arimaha guduhu soo raaciyeen,
- waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in diwaan galinta codbixiyaha ay marwalba ka horayso diwaan galinta codbixiyaha oo aan qof codbixiye ah aan la siin kaadhka codbixinta isaga oo aan qaadan kaadhka diwaanglinta mu waadinka .
- ugu danbayn waxaan soo jeedinayaa in talada lagu daro in doorasho xor oo xalaal ahi ha inoo dhacdo oo taageero oo soo dhaweeya ayaan kaga baxayaa waad mahadsantihiin.

20. **Md. Cabdiqaadir Jaamac Xamud:-** shirgudoonka iyo mudanayaashaba waan salaamayaa waxaanan ku salaamayaa salaanta islaamka xeerkani waa xeer aad u muhiim ah inbadana waa laga dooday xeerkan oo qodobadii aan wax ku darilahaa waxbadan ayaa laga dooday markaa meelaha aan wax ku darayo ama aan is dul taagayo waa goobaha oo Gobolada intooda badani ay ka qayliyeen oo aan leeyahay goobihii hore ee doorashoonyinka lagu galay hala raaco ayaan leeyahay waayo waxaan leeyahay aad ayay ugu yaryihiin oo dadka intaa lagu madiwaan galinkaro.

Qodobka 17aad ee sugitaanka muwaadinka waxaa cadaynaya Caaqil waxaan ku dari lahaa sida ay mudanayaashii iga horeeyay ay soo jeediyeen ayaan ku raacsanahay,

**Soo jeedin:-**

- waxaa kale oo aan leeyahay xeerkani waa xeer aad u muhiim ah waayo waxaan rabnaa si doorasho xor oo xaalaal ahi inoogu dhacdo qof kastaa waa in uu is diwaan galiyaa.
- Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in xeerkan lagu ansixiyo lifaaqii gudidda arimaga Gududuhu soo raacisay.
- Xeerkan marka inahaas oo dhan lagu daro in la ansixiyo ayaan soo jeedinayaa.

21. **Md. Axmed Maxamed Nuur:-** shirgudoonka iyo mudanayaashaba waan salaamayaa mudanayaal heshiiskaa la heshiiyay waan qaadanay taasi waa qodob, qodobka labaad ee aan ka hadlayaa waxaa uu yahay waxaa leeyahay xeerkan halaga dhigo laba xeer oo kala duwan laba magacna kala wata.

Mudanayaal xeerka diwaan galintu hore ayuu u jiray inkastoo aan mar dhexdiiya aan laalnay oo hadana mar dhexdiiya komishanku uu golaha u soo celiyay waxaan leeyahay xeerkaa ha la yidhaa xeerka diwaangalinta codbixiyayaasha oo kaabis iyo wax kabadal lagu sameeyay. Xeerka kale waxaan u bixinayaa xeerka diwaangalinta taysarada muwaadinka waayo waxaan sidaa u leeyahay dee diwaan galinta muwaadinku arintaa ka badan ayay u baahantahay oo waxay u baahantahay family sheet ayay u baahantahay oo qosku inta uu ka kooban yahay ayay u baahan tahay.

Markaa anigu waxaa leeyahay hala kala qaado labadaa xeer oo intaa wuu kabaaldhan yahaye

Tankale ee goobaha codbixintu aad ayay u yartahaye waayo hadaynaan is yeel yeelayn dalka codbixin hore ayaa ka dhacday kun iyo dhawr boq ayay ahay sidaa awgeed labadaa boqol ee la sheegay hadii wdanka loo qaybiyo aad ayay ugu yaraanaysaa oo wax ku filan maahan oo sida aan lawada soconay ee aan ka warhaynay tuulo kasta wayka dhacday tii hore oo waa la diwaan galiayay oo qofka tuulo joogaa degmada ma iman karayo.

**Qodobka 9aad farqadiisa 1aad** waxy sheegaysaa maray dhamaato hawl-maalmeeka shaqo ee diwaangalinta dhaamaan qalabka loo isticmaalay diwaan galinta waxaa lagu celinayaa xafiiska Degmada. Farqadaasi waxay cadynaysaa in aan loogu talo galin in magaalo madaxda iyo dagmada mooyaane in aan meel kale laga duwaan galin dadka taasina aqli galmaahan ayaa qabaa oo Matalan waxaa jirta tuulo ilaa 80kmr u jirta dagmada dadkuna ma imankarayaan degmada.

**Qodobka 17aad faqadiisa 1aad** waxay sheegaysaa in caaqilku masuul

Ka yahay qofka la diwaan galinayo oo la dhaarinayo mudanayaa waxaa jira in barigii hore intan dadku ka yaraayeen oo caaqil waliba uu dadkiisa garanayay hadana dadkan hadu aad ayuu u badan yahay oo dadkiiba kala garan maayo dadka ee waxaan leeyahay Caaqil, suldaan,iyo xildhibaana sugi karmaayaan dadka oo qaranba maayaane waxaan leeyah qofka laftiisa ha dhaariyo in uu muwadin yahay.

**Qodobka 18aad farqadiisa 3aad** waxay leedahay sidan:-

Waxa isla goobtaasi lagu siinaya qof kasta oo ay sugnaato muwaadinnimadiisu warqad aqoonsi oo ku-meel gaadh ah waayo loo siinayaa mid ku meel gaadh ah ee loo siinwaayay mid rasmi ah goormaase loo badalayaa waan ka soo horjeedaa farqadaa oo waxaan leeyahay waa in goobta lagu siiyaa warqada rasmiga ah oo ku meel gaadhka laga saaraa meesha.

**Qodobka 21aad farqadiisa 1aad ilaa 6aad** waxay inoo cadaynaysaa in diwaan galintu tahay qaadashada taysaradoo kaliya taasna hore ayaan uga hadlay, mida kale dhaqaalaha ku baxaya waxaa la yidhi dhawr milyan ayaa ku baxaya ayaan maqlay sidaa awgeed waxaa leeyahay in dalka aan taysaro oo kaliya la siine in macluumaadka loo dhamaystiro ayaa soo jeedinayaa si aanay u noqon mid hadhdhaw lagu noqdo

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- in xeerka la kal saaro oo laba laga dhigo mid lagu magacaabo taysarada midna kas codbixiyayaasha
- waan in goobaha lagu saleeyaa goobihii hore ee doorashooyinku ka dheceen dalka
- waa in doorashooyinku ku qabsoomaan wakhtigii loogu talo galay

**22. Md. Siciid Cilmi Roole:-** dhamaaan waan idin salmayaa marka ugu horaysa waxaan ugu horaysiinayaa warqadaa madaxweynuhu soo gudbiyay ayaan wixii laga filayay laguma soo qorin meesha waana run taasi waanan qirayaa taas . waxaan ka hadlayaa meeshan aamin la'aan ayaa taala waayo cidii lala tartamayay ayaa wixiiba gacanta ku haysa caalamkuna waxaa uu dimuquraadiyada loo sameeyay cida doorashada galaysa waa in aanay shaqo ku yeelan hawsheeda, hada waxaa weeyi kaadhashana waxa ay xanibayaan doorashada cida midida daadbkeeda haysaana waa cida doorasha galaysa oo siday doonaan ayay ka yeelayaan sidaa awgeed waxay kordhin karaan goobaha ay is yidhaahdaan cod ayaad ka helaysaa markaa ayaa ka masuul ah, yaase ka masuul ah.

Tusaale ahaan meesha halkan waxay ku qoreen hadii ay dhacdo in muwaadiniinta qaarkood ay suurto galiwaydo in ay hore u sii qaataan warqada aqoonsiga muwaadinka waan in wasaarada arimaha gudaha ku sugtaa muwaadinimadooda goobta kaadhka codbixinta. Hadii aanay joogin lama odhan waxaas ayaa dhacaya iyagaana gacanta loo galiyay goobtii kaadhkii laga qaadanayay waxaanay wali gacanta ugu jirtaa wasaarada arimaha gudaha oo doorashadii qaybka ah markaa xagay cadaaladi jirtaa, markaa waxaan leeyahay sidaan uga shaqayna lahayn oo loo sii clear garayn lahaana la islaqaaday taasina qodob weeyaan lakiin wali waxbaa jira.

Takale waxaa jira oo maalintii dhawayd halkan wasiirku ka yidhi waxaan sedexdaa bilood ka bacdi lagu wareejinayaa waa dawladaha hoose waay hadii ay daacadi jirtee waayo hadii ay ku dhamaanwaydo intaa waana hadlakii

wasiirku uu ka yidhi golha wakiilada hortooda markaa taa lafteeda hadaan ku badalno waa arin ayaan leeyahay.

Xaalada dalkuna waabay ka sii daraysaa waxaan ka hadlaynaan waa doorasho oo saaka ragii xiin galool ku shirayay waxay joogaan garoowe oo sida uu sheegay wasiirkii ay khusaysay waxaa uu yidhi halkaa khayr ayaa ka soo baxaya ,sidaa daraadeed dakii waa la didinayaa inan doorosho ayaan kahadlaynaa ama side ayaan u aaminaynaa in kaadhkii codbixinta gacanta inoogu qabtaan markaa.

Waxaanan taageersanahay in doorashada golaha wakiilada iyo ta wakiiladu mar ay wada dhacaan oo ay dhacaan 26 jun oo aanay dhaafin xiligii loo qorsheeyay, halka uu xildhibaankii hore sheegay ee uu yidhi distoorkaa cayimay distoorku maalinta ma cajiyim ee waxaa uu sheegay in ay 5 shan sanadood tahay, waanarun sida uu sheegay cid ayay khusaysaa oo wali kamaynaan saarin oo marka aafo jirto aafadii ayuunbaa la wadaa. Sidaa awgeed aniga oo dadwaynaha lahad laaya ayaan leeyahay baroortu ceesaanta ka wayn waxa halkaa ka soo socdana aan ogaano dadyahaw nabad galyadiinan ilaashada ayaan leeyahay

Waxaa kale oo aan taageersanahay in xeerkan laba laga kala dhigo laakiin isheedii ma arkaayo, dhanka kale ee ah goobaha diwaan galinta codbixiyayaasha sida hore loosheegay ee la leeyahay ma xadidi karno waxaan leeyahay xeerasha inagaa xadayna oo xaq u leh waayo marar badan ayaad awooda inga qaadeen oo awoodeena inoo daaya waayo xaq ayaan u leenahay in aan labada boqol badali karno waayo maxaan ku ogaanayaa in ay si siman u gaadhayso dadweynaha Somaliland oo dhan waayo cida awooda la siiyay waa wasaarada arimaha gudaha xataa laguma darin Maxkamada.

**Qodobka 7aad** waxaa uu leeyahay ansixinta diwaan galinta waxaa awoodeeda la siiyay wasaarada arimaha gudaha halkaa waan ka saarayaa waayo wasaadu waxba ma ansixiso waxaanan ku badalayaa hirgalinta halkaa ansixinta,
Waxaa kale oo aan idintusayaa in ay khiyaamo ku jirto bahalkan waayo waxaa laga saaray shaygii kaliyahaa ee aan ku kala bixi lahayn ee ahaa indhaha halaga qaado ayaan meesha ku jirin waana ta kaliya ee aan ku kala baxsan lahayn ee kajoojin lahaa ku noqnoqashada waay waxaa jirada dadka qaar ayaa ku noqnoqonaya ee waa in indhahaa lagu qoraa.

**Qodobka 28aad** ee xeerka doorashada waxaa ku taala komishanka ayaan ku dhawaaqaya maalinta, halkana waa laga badalay oo waxaa laga dhigay madaxweynaha ayaa ku dhawaaqaya halkaa waan ka badalay qodobkaa waayo

madaxweynuhu shaqo kuma malaha arimaha diwaan galinta, xaqna uma laha waayo komishanka ayaan ku dhawaaqaya maalinta doorashada sharciyan, Mudane gudoomiya awoodihii komishanka dhamaan cidkale ayaa gacanta loo galiyay markaa waxaan u dhigayaa sidan komishanka ayaa ku dhawaaqaya xiliga doorashada wanan ka baxay waad mahadsantihiim

23. **Maxamed Xuseen X Ciise:-** dhamaan shirgudoonka, xildhibaanada iyo shaqaalahaba waan salaamayaa waxaad moodaa in xeerka laga dhigayo laba xeer aniga aragtidayda markaan eego waxay ila tahay waa qabyo qoraal iyo waxka badal ee maaha mid cub iyo mid kale oo la isku darayo sidaa awgeed xeerku waa laba qaybood qaybta hore waxay ka hadlaysaa Muwaadiniinta qaybta labaadna waa diwaan galinta codbixiyayaasha.
Xeerkan waad moodaa in laga soo dheegay xeerka ama waxka badal lagu samaynayo qaabdhismeedka xeerkii hore ee 37 qodobkiisa 7aad ee xeerkaasi ayaa waxaa uu sheegay qaabka diwaan galintu u soconayso waxaa kale oo uu sheegayaa in wasaarada arimaha guduhu sugayso muwaadinka, marka la sugo in kadibna la sameeyo codbixinta sidaa awgeed waxaa la saxay qaladaad kii hore ee lagabartay doorashooyinkii hore ee wax cusubi kuma jiraan.

Waxaa kale oo jirta dee lama laha dhamaan muwaadiniinta oo dhan ayaa la duwaan galinayaaye maahee maadaama doorasho lagalayo oo cida galaysaana ay tahay muwaadin waa in la cadeeyaa xeerka 37 waa uu qorayaa lifaaqii 2008 na waa uu qorayaa lifaaqaasina waxtigiisu wuu dhamaaday.

Marka aan eegno warqadii ay ku heshiiyeen labadaxisbi iyo xukuumaduba waxaan leeyahay wax ceeba malahan ee waa in sideeda loo qaataa lakiin waxaan ku taalay qof aan sidan kaadhka diwaan galinta in aanu qaadan kaadhka codbixinta oo xeerka sidaa aayay ugu sugan tahay oo xeerkaa ayaa qeexaya iyo siyaabaha loosugaayo oo marka hore ayay cadayd.

Hadii ay dhacdo in muwaadiniintu hore u sii qaataan kaadhka diwaan galinta codbixiyaha waa in wasaarada arimaha gudu sugtaa miwaadinimadooda goobta shaqada ee qaadashada kaadhka wayna dhici kartaa in la sahashado oo dad badani ay sahashadaan oo halkaa far ayaa igaga godan, lakiin marhadii la isla qaatay waxba kuma jabna.

Hadii aan u imaado xeerka oo aan ka bilaabo eraybixinta diwaan galinta way qaldeen oo waxay ka dhigeen diiwaanada halkaana waxaan uga jeeda sixid uune, **Qodobka 7aad** halka ugu danbaysa wax ayay ka qaldeen iyana ha la soxo ayaan odhan lahaa, **Qodobka 17aad** waxaan raacsanahay sidii ay xildhibaanadii hore yidhaahdeen in aanu caaqil kaliya aanu ku filayn cadaynta muwaadin oo aanu meel walba joojin markaa waxaa ku raacsanahay in halkaa

la kordhiyo oo lagu daro hadii ay xildhibaanada iyo intii ay sheegeen xildhibaanaduba waan tageersanahay.

**Qodobka 18aad** Qofkasta oo ku guul-daraysta in uu caaq ama sida ku xusan **Qodobka 17aad farqadiisa 1aad** ee xeerka ayaan ku darayaa waayo sida aan halka hore ku soo sheegnay waa in la waafajiyaa, **Qodobka 21aad** waxaan ku dari lahaa **Farqad 7aad** oo sheegaysa xaalada xaasnimo oo la yidhaa ma xaasbaa mise xaasmaaha, **Qodobka 23aad** waashaqaalaha diwaan galinta codbixiya waxaa ka waadaxsan oo ka faahfaahsan **Qodobka 9aad** ee xeerka diwaangalinta sidaa awgeed waxaa igala haboon in sidiisii hore lagu daayo.

**Qodobka 27aad** ee shaqada komishan doorashooyinka qaranka **farqadiisa 1aad** waxaa uu dalka Somaliland ka dhanqan galayaa ka hor taariikhda doorashada, waxaan odhan lahaa sida ku cad ama waafaqsan qodobka 7aad ee xeerkan.

**Waxaan soo jeedinyaa:´-**

- Waan taageersanahay wax-ka badalkii ay soo sameeyeen Gudidda Arimaha gudahu
- Ta xibiyadu ku heshiiyeena waan taageersanahay inta kalana waa sida aan hore u soo sheegay waanad mahadsantihiin.

| **Opened: - 09:47 AM** | **DAY FOUR** | **Kal-fadhiga 25aad** |
|---|---|---|

**Fadhigii 23aad 27/09/2014**

24. **Md. Saleeban Cawad Cali:-** muhiimada Xeerka waan taageersanahey diiwaanglinta Madaniga, waxaan leeyahay Xeerkan ha la de-dajiyo waa xeer dadka iyo dalka u muhiima, waxaan soo jeedinayaa in doorashooyinku is-raacaan.

25. **Md. Axmed Barkhad Obsiiye:-** Xeerkani mudo inoo horyaaley oo anigu waxaanba moodayay iney doodiisii dhamaatey, Xeerka Gudidu si bay u soo gudbisey oo si fiican bay u soo gudbiyeen oo qodobkii ay wax ka badaleen waan ku raacsanahey, waxaa weeye Xeerka in lagu daro “isha” waayo kuma cada in Diiwaangalinta isha la qaadayo iyo in far la qaadayo oo laga sawiro, markaa anigu intaa ha lagu daro ayaan odhan lahaa, xeerka intiisa kale sidiisa ha loo ansixiyo, yaanu inagu raagin hadii kale wakhtiguun baa inagu dheeraanaya, wasalaama Caleykum.

**26. Md. Xaamud Cismaan Cigaal:-** ASC, marka aan doodan ku soo noqdo sida aynu ognahey way bilaabantey Diiwaangalintii maantana doodu maalintii afraad bay mareysaa, halkaa waxaa ka muuqata, canaani way taal Golaha, dawladana canaani way u taal, oo waxaa iminka kal-fadhigan 12 arrimood baa ajendeheena ku jiray, labo waa la ansixiyay, 10kii kale way yaalaan, sababtuna inaga ayaan shaqeynin, canaanta dawladu waxay weeye tii hore oo aan dhamaanin ayay mid kale ka daba geynayaan, markaa waxaan inagu boorinayaa bal inta doorashadani dhaceyso inaynu hawshaa ka faraxalano, waayo hawl qabyo ah in barlamaanka cusub looga tago maaha, walaal dhamaanteen waxaan inagu baraarujinayaa ku dibada jooga iyo mid gudaha joogaba inaynu shaqada kordhino, saacad iyo badh baynu shaqeynaa, markaa hadeynu 7da nimaadno oo 12ka rawaxno hawlo badan baynu qaban karnaa.

Gudidii arrimaha Gudaha ee aheyd inay soo habeyso sharcigan ina horyaala hal qodob oo kaliya ayay ka hadleen, inta khalad soo baxdeyna waynu arkeynaa, hadii sharci aan dhameystirneyn duuduub lagu ansixiyo khald weyn weeye, waxaan idinka codsanayaa inaynaan sharci aan dhameystirneyn ansixino, hala de-dejiyo gartey laakiin duuduub ha lagu qaato wax sharci ah maaha.

Anigu khaladaad badan baan hayaa, waxaa ugu horeeya oo arrimaha aan diidanahey ka mid ah **Qodobka 6aad** oo 4 farqadood ka kooban, waxaa muuqata in laga qaadey dad wadani ah jinsiyadoodii sabab ay geysteena laga gama qaadin, waxay geesteena ma jirto, waxaa ka mid ah qofka miyirkiisu doorsoon yahay, dee qofka miyirkiisu doorsoon yahay haduu codeeyo iyo hadaanu codeynin in jinsiyadiisii laga qaado maaha, qofka aan da'diius wali qaan-gaadhin in laga qaado maaha oo la yidhaahdo ma banaan in la diiwaangaliyo, dadka ajnabiga ah ee dalka ku nool dee sharci umeynaan dejin baan filayaa, laakiin caalamka xorta ah qofka deganaansho lihi xaq buu u leeyahey inuu codeeyo.

Waxaa kaloo jirta oo Wasiirka Arrimaha Guduhu halkan inooga sheegay, waxaa jirta saddexdan bilood ee inta badan laga hadlay ee la yidhi way yartahey waxaa ku kalifey IMF iyo World Banka siduu inoo sheegay oo yidhi December marka lagaadho waxaanu idinka dooneynaa qofwalba inuu heysto aqoonsigiisii, taasina waxay khilaafsan tahay in loo gudbiyo hay'ad ajnabi ah ama dal ajnabi ah macluumaad qof wadani ah, halkaa waxaa ka muuqata wasiirka arrimaha Guduhu aanu ka fiirsan dambi wey ku noqoneysaa hadii macluumaadka qof wadani ah uu u gudbiyo hay'ad ama dal ajnabi ah.

Waxaa kale oo aan tilmaamayaa, mudada aan wali la iska gaadhin ee dadku tilmaamayaan inay 26ka june noqoto, 26ka june dalka intiisa badan xaq kuma

aha, Gobolka anigu aan ka tirsanahey ee Gudoomiyaheena iyo xildhibaano kale ee xeerka ku yaala, marka lawya cado laga soo bilaabo ilaa laasqorey 26ka june cidi ma joogto, Golahan oo iminka 10kii sano u dhamaanayaan waxay doorashadiisu dhacdey September, waxaan xasuusnahey in magaalada biyihii ay ka dhamaadeen markaa wax dhici kara oo suuroobi kara maaha, hadii ay tahay khidad in dadka qaarkii aaney soo noqonin wax wanaagsan maaha.

**Qodobka 33aad** shaqaalaha Diiwaangalinta Codbixiyayaasha, in la siiyo talo komishanka in raga ka noqonaya maamulayaasha halkan la iska diiwaangalinayo in la weydiiyo dadka murashaxiinta ah ee goobtaa ay joogaan ka murashaxiinta ah inay qaraabo yihiin ama wax isku yihiin sidoo kale kuwa kale ee ka shaqeynaya ee kaa ka hooseeya in taas oo kale la weydiiyo, dabadeedna hadii ay meeluun qaraabo iyo wax iskaga yihiin waa inaan looga dhigin halkaa madax ama shaqaale.

Waxaa kaloo jirta, goobaha hore waa looga Hadley inay aad iyo aad u yaryihiin, tusaale ahaan Gobolka Saaxil waxaan hayaa 21 tuulo oo aan sanduuq oolin meesha ugu dhowina tahey ilaaa dhowr iyo sodon kilometer, dee markaa miyaaney dulmi aheyn in dadka la isku dul buuxiyo oo la yidhaahdo halkaa taga iyagoo waxay ku tagi karaan aaney jirin, markaa waxaan soo jeedinayaa Goobihii codbixintu ka dhacdey doorashooyinkii hore iney noqdaan goobo Diiwaangalineed.

Waxaa kale oo iminka inagu soo kordhey madaama ay bilaabantey is diiwaangalintii iyadoo sharcigii loo sameynin, dee hadeynu hadana iska hor-nimaadno waa dhibaato laakiin codkii soo jeediney inaynu diidanahey soo jeediney, laakiin aynu sameyno iskaashi waxani si ay inoogu hirgalaan inagoo caloosheenu isu wada furan tahay, sidii aan markii hore tilmaameyna ra'yiga hadii aad qof isku khilaaftaan dee cadaawadi idinma dhextaalo, inay dhacdona maaha, waxaan maqlaa in maagacyo badan la isugu yeedhayo islaamkana waa xaaraan naaneys iyo tilmaam la isugu yeedho qofku ha ku jiro waxaas ama yaanu ku jirine.

**27. Md. C/raxmaan Muuse Jaamac:-** shir-gudoonka, mudanayaasha, xogheynta iyo warbaahinta dhamaan waad salaaman tihiin, anigu hal qodob baan ka hadlayaa kaas oo ah "ishii" oo aan ku jirin xeerka iminka ina horyaal iyo wasiirkii oo sheegay inay ku jiraan qaabka dadka loo diiwaangalinayo ay ku jirto qofku inuu xaas yahay iyo in kale, markaa xaaskii kuma jiro, markaa Qodobka 31aad ee formaka waa in lagu daro ma xaasbaa mise doob, sidoo kale lagu daro caruur wuxuu leeyahay si formkii family sheetka loogu buuxiyo, waxaan kale oo aan soo jeedinayaa "isha" oo madaxweynaha waa tii laga

qaadey, markaa xeerka way ka maqan tahey waan in iyana lagu daro, labadaa qodob baan anigu ka hadlayaa.

Waxa kale oo laga Hadley oo dadku ay aad uga cabanayaan in goobuhu yar yihiin, xaley qolo buuhoodle iga soo caweysey waxay ii sheegeen in 3 goobood la siiyay, marka saddex goobood waxay anfacayaan ma jiraa, dadka in baabuur lagu soo guro mooyaane, meeshoodiina la tagi maayo, markaa waxaan leeyahay meelaha ay dadku kala fogyihiin waa in dib loogu noqdaa oo goobaha la kordhiyo, waana iney jiraan riseef meelaha laga soo qeyliyo lagu kabo,sida shiikhu sheegayna waan ku raacsanahey in qofka goob uu ehelkiisu jooga laga fogeeyo taasna waan ku raacsanahey, labada doorashona waa in mar la wada qabtaa.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Waa in xiligoodii doorashooyinku ku dhacaan, isla markaana waa in labada doorasho ee Madaxweynaha iyo Golaha Wakiilada la isku daro oo mar la wada qabto, waxaan kale oo aan soo dhoweynayaa oo aan taageersanahey in sidooda loo qaato soo jeedintii Gudidda iyo waraaqdii lifaaqa lagu heshiiyay.

**28. Md. Maxamuud Jaamac Cilmi (dable):-** Gudoomiyaha iyo mudanayaasha waad salaaman tihiin, aniga hadhey looma hadlee waa la dhameeyay, inta hadheyna inay sii akido uun weeye, waxyaabihii ugu muhiimsanaa ee la is dultaagey ayaa muhiima, horta doorashadu waa sidii halkan madaxweynuhu markuu inoogu yimi u sheegey, afrikana waxay ku bur-burtaa waa doorashooyinka, waliba dunida saddexaad waynu ka sii liidanaa, duurafeheenu way ka adag yihiin, axsaabta raga u madaxda ah inay ogaadaan si loo nabadgalo ayaa ka wanaagsan in nin la doorto, waxaan soo jeedin lahaa in la wacyigaliyo shacbiga oo waliba axsaabtu ay wacyigaliso doorashooyinka iyo raga doorashada u taagan nabadgalyadu inay muhiimada leedahay oo ay siiyaan, wax ‘aadam gacanta cid ku heysaana ma jirto, gudoomiyeheenana waxaan u rajeynayaa ilaahey inuu soo saaro, waayo isagaa inagu xaq leh.

Assaaska dastuurku jamhuuriyada Somaliland waxa weeye qaacidada rasmiga ah ee ka duulo, doorashooyinka iyo jinsiyada, jinsiyadaa horeysa ee doorashadu ma horeyso, waayo iyadaa ka muhiimsan, waxyaabaha cajiibka ha ninkii la dooranayay kumanaan goobo ayaa loo sameynayaa, ninkii jinsiyadiisa Somaliland 1991kii markey la soo noqotey madax-banaanideeda ma jirto wax xuquuq ah oo halkan ku cad, waa in muhiimada kowaad la siiyo jinsiyada iyo inuu qofku qaato waraaqda aqoonsiga, maaha 1400 oo goobood baa la siinayaa qofka la dooranayo, ninka muwaadinka ah ee jinsiyada qaadanaya waxaa la

siinayaa 100 goobood, waxyaabaha la isku dilo ayay ka mid tahay afrika, markaa waxaan odhan lahaa Goobaha ha la is dultaago, waa kuwa dhibaatada keenaya oo nin waliba hadhaw odhanayo meesha dulmi baa ku jir oo axsaabtu ugu horeyso.

Sidaa awgeed halkaa ha la is dultaago, oo halaga dhigo goobaha loo baahnaa oo muwaadinka iyo wadanku u baahnaa maaha goobaha uu ninka musharaxa ah u baahnaa, waana qodob dastuuriya oo dastuurka ayaa sheegaya jinsiyada oo waa Qodobka 5aad oo waa arrin aan la dhayalsan kari, halkaa caaqilka la yidhi iyana caaqilku maaha mid diyaarad ku duulaya, markaa halkaasina waa meelaha mushkilada keenaya, waa in la siiyaa badhasaabka iyo raga tuulooyinka headka ka ah, maayorka, imaamka masaajidka ah la siiyo cid goobta iska diiwaangalineysa oo iyagu cadeyaan, markaa arrinkaa ha la eego oo ha la siiyo inta qof ee uu goobaha geysanaayo, ha la geeyo kitaab jaamac oo la isku dhaariyo.

Ninka wax sameeya (dambi gala) ee halkan lagu qorey ciqaabaadka noqonaya 15ka, waxaa ila wanaagsan in halka la yidhaahdo sida qaanuunk ciqaabta wadanka u yaala wadanka loo raaco, kaadhku markuu lumo waxaa la yidhi wasaarada taga, wasaarada la tagimaayo, caalamka marka passport ama lisence kaa lumo waa inaad tagtaa police stationka kuugu horeeya oo magacaaga iyo sidii wax kaaga lumen oo halkaa la geeyo, dabadeedna uu warqad soo qaato muwaadinku uu booliisku soo siiyay dabadeedna CIDda la socodsiiyo, maaha in la yidhaahdo karaaniga wasaarada jooga u tag, wax kasta sharci iyo hanaan bay leeyihiin.

Arrinka la isla qaatey ee axsaabta iyo xukuumadu ku heshiiyeen horta ku amaanimeyno ee arrin dastuuriya, waxaa ku yaal dastuurka oo sharceeda qodabadeeda ku xiga waa tashaawurka iyo wada-tashiga iyo isu tanaasulka, sidaa awgeed waa arrin aan la inaga baryayn ee waajib ah, waajibkiina waa la marey, Soo celinta la inagu soo celiyay waa qodob dastuuriya awoodaha Madaxweynaha ayay ka mid tahay waana Qodobka 90aad oo taasina waa sharci.

29. **Md. Axmed Cabdi Nuur (kijaandhe):-** shir-gudoonka iyo mudanayaasha sharafta leh dhamaan waan salaamayaa, runtii labada xeer ee aynu saaka halkan ku heynaa gudoomiye muhiimad weyn bay horta dalkan u leeyihiin, wailba aniga waxaa ila sii muhiimsan Xeer Diiwaangalinta Madaniga ah, sababtu waxa weeye dalka ma lihin oo garanmeyno dadka lihi intey ka kooban yihiin, ma garaneyno inta qaxooti ah ee jooga, ma naqaano inta sharci daro joogta, markaa nimanyahow yaynaan arrinkaa dhayalsan, iminka wasiirka arrimaha hadeynu u yeedhno inta ajaanib iyo qaxooti jooga ma yaqaan oo ka

jawaabi karimaayo, maanta dambiyada ugu badan dalka waxaa sameeya dad dalka ku qariiba.

Markaa anigu labadaa xeer ee maanta isku lifaaqan xeerka diiwaangalintu isagaa ka muhiimsan kan codbixiyayaasha, sababtu dalkan dadkii lahaa garanmeyno, habeen dhoweyd waxaan eegay diiwaangalinta muwaadnka sida loo sameeyo, dalka Sweden ayaa ugu horeeyay dal dadkiisa diiwaangaliyay, wuxuu diiwaangaliyay dadkiisa 1535tii mar ay baaro heleen, inana inagoo 2014kii joogna ma naqaano dadka dalkeena jooga waxay yihiin, markaa anigu waan ku cel-celinayaaye muhiimad weyn buu inoo leeyayay, hargeysa 1960kii waxaa joogey 30kun in ka yar.

Somalildu waxay ku maah-maahdaa arrin dhamaan waaya hadaad aragto waxaan ku jiri laheyn baa ku jira ama waxa ku jira lahaa baa ka maqan, waxaan leeyahey arrinkan diiwaangalinta codbixiyayaasha wuu inaga dhamaan waayay oo 9kii sano ee dambeeyay baynu ka hadleynay, marka wax ku jiri lahaa baa ka maqan ama wax aan ku jiri laheyn baa ku jira, gudoomiye taa madax baad ugu tahey, sababtu waxa weeye wuu dhamaan waayay, nin waliba sidii xisbigiisa ugu badan laheyd buu ka eegayaa, markaa anigu arrinkan aad baan siiriyas uga ahey siduu uu sheegay cheifku arrinta doorashooyinka iyo waxani waa waxa dalalka afrika khilaafka iyo colaadaha ka dhaliya, waxyaabaha aad looga hadlo waxa ka mid ah goobaha doorashooyinka sida loo qeybinayo, ma waxaynu garanweyney 20kii kilometer ee iskuweer ahba hal goob ah la dhigo si equity distribution aynu u sameyno, taasi way inakala xaq siineysaa hadeynu ku shaqeyno.

Markaa waxaan leeyahay xeerkani aad buu muhiim u yahay waxyaabo badan oo nusqaan ahina way ku jiraan, markaa si fiican aynu u eegno, hadii aynu isku darno iyo hadeynu kala saarno labaduba ay dhici kartaa, laakiin aynu ka eegno siduu dalka u anfacayo, maaha siduu aniga ii anfacayo ama adiga kuu anfacayo ama dawlada joogta u anfacayo, sidaasuu dalkeenu u hagaagayaa.

Hadaan Xeerka u soo noqdo, xeerkan kuma qorna meesha la eegayo sanka, faraha iyo indhaha key tahay, tan kale waxaynu nidhi Qodobka 17aad qofka raba inuu is diiwaangaliyo, markaa waa in khasab laga dhigaa oo qof walba oo muwaadin ahba waa inuu is diiwaangaliyaa oo aynaan option ka dhigin, laakiin tan codbixiyayaasha iyadu option oo ninkii raba ayaa qaadan kara, markaa labada waa ineynu sidaa u kala saarnaa, ragii iga horeeyay waxay sheegeen inaynaaney caaqil kaliya ku filneyn taasna waan taageersanahey.

Formamka diiwaangalinta waxa lagu qorayo iyo cinwaanada ha la galiyo, dee lacago badan baynu ku kharashgareynaye waa ineynu ka shaqeynaa aynu mar qudha u sameyn lahayn oo database u yeelan laheyd.

**30. Md. Axmed Ducaale Bulaale:-** horta marka hore waxaa ina horyaal waa xeer, anigu waxaan ugu horeysiinayaa horta diiwaangalin madaniya ma u baahanahey mise uma baahnin, jawaabtu waa loo baahan yahay weeye diiwaangalin madaniya oo wadanku kaadhkii heystaan waa loo baahan yahay, laakiin had iyo jeer diiwaangalin tan codbixinta doorashoyinka ama tan madaniga ha noqotee, waxay ina soo galaan iyadoo maskaxdeena ay doorasho ka guuxeyso, waxaan leeyahay xeerka aynu ka doodno oo aynu saxno iyadoo maskaxdeena doorasho aaney ka guuxeyn.

Markaan xeerka aan ku soo dhowaado, magaca Xeerku xambaarsan yahay anigu waxaan leeyahay ha la saxo xeer Lr. 37 baa ku taal, ma wax ka badal baa ma laba xeer oo isa saaran baa, waa ineynu ujeedada hore ku qeexnaaa oo wuxu ma xeer cusubaa mise waa wax ka badal markeynu xaga sharci ka eegayno, waxaa kale oo xeerka ka maqan inaynu xeerarkii kale la akhrino, hadeynu qaadano mabaadiida ah inaynu diiwaangalino dadkeena oo loo baahan yahay si aynu u kala saarno kuwa ajaanibka ah iyo kuwa muwaadinka ah waa inaynu xeerka hagaajintiisa si wanaagsan uga shaqeynaa oo aynu hubinaa sida uu inoo anfacayo, wuxuu u baahan yahay in lala akhriyo xeerarka kale oo ay ka mid tahay Xeerka Jinsiyada iyo Xeerarka ee doorashooyinka.

Waxaa kaloo intaa ii raaca marka laga hadlayo goobaha diiwaangalinta, Xeerka kuma taalo goobaha diiwaangalinta Civil registrationku intey noqonayaan, markaa waa iney ku cadahey intey noqonayaa, marka lala akhriyo xeerka doorashooyinka ku taala goobuhu waxay noqonayaa goobo codbixineed, markaa waa in la hubo goobuhu inay dadka ku filan yihiin oo aan hubo goobaha aan ka soo jeeday dadka in laga diiwaangaliyo mudadaa yar ee haystaan xeerkana ku cadahey iyo sida la doonayo in loo fuliyo.

Waxa kale ku taala Xeerka Gobolada iyo Degmooyinka in diiwaangalinta madaniga ay dawladaha hoose ayaa ku shaqa leh, waxa kale oo uu sheegayaa in Wasaarada Arrimaha Guduhu ay soo sameynayso Xeer-nidaamiye arrintaa Diiwaangalinta madaniga waxa kaga maamuleyso, qodobkaa waxaan leeyahay waa in Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo Dawladaha Hoose wada maamulaan diiwaangalinta madaniga sida xeerkuba sheegayo, goobahana dee hadaan wax laga badaleyn waxay ku cadahey xeerka doorashooyinka oo odhanaya Goobaha codbixintu waa goobaha diiwaangalinta, hadii la leeyahay la leeyahay kharas ku filan baan laheyna waa in la ogaado goobuhu ku filan yihiin degmo walba, hadii degmada ceynabo la yidhaahdo 3 bilood dadka ku diiwaangaliya dee ma

diiwaangalayaan oo dadku reer guuraa ah baa jooga oo waxaa dhici karta in wakhtiguba jiilaal ku beegmo oo dadkii sanaag oo meelo kale gaadhaan, markaa waa in goobo ku filan oo la hubo in dadki iswada diiwaangaliyay.

Wasiirka wuxuu inoo sheegay in dadka wixii 16 jir ka weyni is diiwaangalin karo, su'aal baa la weydiiyay oo waxaa la yidhi wixii ka yar side la odhanaya, wuxuu yidhi aabahaa ayaa family sheetka ku qoranaya xeerkana kuma taal, markaa waa ineynu xeerka galinaa dadka 16 ka yar halkee bay ka galayaan diiwaangalinta, waxaa kale oo xeerkan gol-daloolooyinkiisa ka mid ah caaqilka noqonaya ninka hubinaya qofkaasi inuu muwaadin yahay, caaqil marka la yidhaahdo reer baa laga hadlayaa ama jilib baa la sheegayaa, markaan jilibkeyga ka soo qaado dee caaqilku wuxuu jooga Oog dadkii reerka ahaana qaar waxay degan yihiin Hargeysa, Boorame ama berbera, markaa caaqilka ma waxaan ka soo kaxeynayaa oog oo hargeysa ayaan keenayaa, waxaan leeyahey kuma filna waa in loo sameeyo dad badan oo Wakiiladu ka mid yihiin, oo dawladaha hoose ka mid yihiin, waa arrintaan Xeerka lagu daro oo intaa laga dhigaa.

Marka hawshu jirto iyo xeerku waa kala nooc, markaa sida loo fulinayo waa in xeerka lagu cadeeyo hawshaa, waxaa sidoo kale meesha ka taal xeerkanu wuxuu khuseynayaa doorashooyinka, bal mar qudha iyadoo maskaxdeena doorasho ku jirin oo aan cid la garbineyn ama cid la riixeyn isma weydiino horta doorashadani maxay inoo baahan tahay wakhtigey doonta ha qaadatee, markaa waa ineynu taxno waxay u baahan tahay dabadeedna iyadoo garoonkii xaadhan yahay aynu ka fikirno wakhtigii.

Xeerkan muhiimada uu leeyahey, marka hore waa xeer laakiin waxaa dhacda in qoloba meel ka ursato oo ay tahay arragtida siyaasada, markaa anigu waxaan leeyahey iyadoon qoloba meel ka ursan Xeerkaa aynu uwada shaqeyno si wanaagsan Xeer Wanaagana ka dhigno iyadoo maskaxdeena siyaasadi ku jirin ama dabada ciddi aaney inaga eryey, fulintiisa aynu si wanaagasna uga wada shaqeyno, sidoo kale aynu siino wakhti ku filan labada diiwaangalinoodba, xeerka magaciisa iyo qoraalkiisaba aynu hagaajino oo sida uu u qoran yaahy iyo waxa uu yahay wuu kala duwan yahay.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Mar hadeynu Xeerkaa galney aynu wada-galno oo si fiican uga wada shaqeyno Dawlada iyo axsaaba.

**31. Md. Abuubakar C/raxmaan Good:-** Gudoomiyayaasha iyo Golaha waan salaamayaa, Xeerkan ina horyaal oo ah xeer muhiima oo qaranku u baahan yahey, iyadoo ay aheyd sida Xildhibaanka hore sheegay inaynu mar hore sameyno ay aad u fiicneyd hadana maanta joogta, waxaan leeyahay anigu

horta ha la qaato qodobkii ay soo jeediyeen Gudidii ku shaqada laheyd oo sidiisii loo qaato, waxaynu ognahey in doorashada wakhtigeedii la inoo kordhiyay oo laba jeer korodhku ahaa inuu yidhi madaxweynu waa dhiig bax inagoo ka soo baxney doorasho maanta doorasho kale gali karimeyno markii labadaana la eegay in wadanku iska bixin Karin doorasho sanadkiiba mar, sidaa darteed halkan golaha oo lawada jooga uu ka yidhi waa in doorashada la isku raraaa oo wakhtigeedii la qabta, duruuftu waxbay dib u dhigi kartaa, waayo xildhibaanadii dadka ka naxayay baynu nahey, markaa in doorashooyinka la isku soo guuriyo oo mar lawada qabto ayaan anigu taageersanahey.

32. **Md. Ibraahim Axmed Reygal:-** shir-gudoonka sharafta le, Xogheynta iyo Xildhibaanada Golaha ASC, shir-gudoon waxaan doonayaa ka dhiibto dhowr kalmadood qabyo-qoraalka xeerkan diiwaangalinta codbixiyayaash iyo muwadiniinta, waxaynu ogsoonahey inay diiwaangalintu ka mid tahay waxyaabaha qaranimadeena sugaya sida quruun waliba u leedahay aqoonsi, sidaa darteed waa in la qabto golayaasha qaranka, xukuumada, xisbiyada iyo dadweynaha reer Somaliland intuba iney u diyaar garoobaan umada dalkeena inay is diiwaangaliyaan sida quruun waliba u leedahay aqoonsi lagu aqoonsado dadka dalka leh, markaa diiwaangalintu waxay faa'iido leedahay marka hore waa aqoonsi dadka lagu aqoonsanayay, marka hore qorshe walba waxa la sameynayo dee waa lagu xisaabtamayaa dadkeenu waa imisa, hadii horumarin la sameynayo iyo mashaariic, iyo hadii gobolada la isu eegayo sidey u kala dad badan yihin, hadii saami-qeybsi la sameynayo, hadii baarlamaanka la kordhinayo, xataa madax-dhaqameedka caaqilka iyo suldaanku intee bay u noqon karaan caaqil iyo suldaan, markaa waa arrin aan taageerayo.

Arrinta heshiiskii xisbiyada qaranka oo gudoomiyeheenu ka mid yahay taasna waan soo dhoweynayaa, waxayna aheyd arrin wanaagsan oo aan ku hambalyeynayo xukuumada iyo axsaabta, intaa markaan ka soo gudbo, Qodobka 25aad iyo Qodobka 3aad sidii xisbiyada qaranku kaga heshiiyeen baan taageerayaa, waxaan iyadana wax ka odhanayaa **Qodobka 17aad** sugida muwaadinka, horta shir-gudoonka iyo xogheynta waxaan ka codsanayaa marka goluhu xeer ka doodo ee xildhibaanadu wax ka yidhaahdaan meelaha la is dultaago ee secondment hesha waxaa loo baahan yahay marka la isku gurayo in proof reading lagu sameeyo, in dib la isugu shaandheeyo iyo in meelaha xildhibaanadu ka hadleen lagu soo daro, maaha in minuteska inta la soo qoro la inoo qeybiyo dabadeedna nuqulkii aynu ka doodney sidiisii la inoogu qeybiyo gacanta loo taago, markaa waxaan codsanayaa in sidaa xoojino.

Hadaba sugida muwaadinka markeynu leenahay waxaa la sugayaa detailska qofka oo magaciisa oo afar baa ka bilaabanta, meesha qofku ku dhashey,

meehsa uu degan yahay, magaca hooyada, waxaa kale oo ka mid ah caaqil baa sugaya waxaan ku taageerayaa xildhibaanada sharafta leh intii ay ku dareen, tuulo waliba waxay leedahay head tuulo isagaa kow ka ah, imaam bay leedahay tuulo walba, waxaan ku darayaa madax-dhaqameedka suldaan, dabadeedna xildhibaanadii Golaha deegaanka iyo gudida horumarinta deegaanka intaas oo dhan aynu ku qorno.

Sidaa darteed waxaan Soo jeedinayaa, Arrinta Diiwaangalinta waa inaynu u tabaabusheysano dhaqaalena loo diyaariyo tuulo ilaa heer gobol, sababtu waxay weeye dadku waxay u baahan yihiin in la qanciyo oo la wacyi galiyo, markaa xidhibaano iyo axsaaba waa inaynu ka wada hawlgalnaa.

Maalin dhoweyd markii Wasaarada Arrimaha Guduhu isugu yeedhay arrin soo baxdey baa jirtey oo dalkaba gil-gishey, nimanbaa tagey shirkado ah oo waxay yidhaahdeen degmo walba halkan ayaa laga diiwaangalinayaa, ka soo qaad Gobolka Bali-gubadle, bali-gubadleba kuma jiro oo laba tuulo oo kale inta la qorey ayaa halkan ayaa dadka laga diiwaangalinayaa, waa qiso dhacey oo aniga gobolkeyga way ka dhacey, markii la yidhi maxaad aheydeen waxay yidhaahdeen shirkad qandaraaska qaadatey baanu nahey, waa in diiwaangalintu ku saleysnaataa Gobol iyo degmo, hadii la leeyahay meeshu network waa sax, laakiin hadii meeshu tahay buur dusheen goormey network heshay, midina way jirtaa oo waynu naqaaney in marka abaari dhacdo in dadku meel kale u guuro sanduuqu in meeshii dadku u guurey la geeyo.

Meelaha aynu ka baqeyno in laba diiwaangalinood ka dhacdo, waa saddex meelood, meeli waa xuduudada dalalka aynu dariska nahey, meesha labaadna waa meelaha goboladu iskaga xidhmaa,

**Ugu dambeyn waxaan codsaneynaa:-**

- Marka doodu dhamaato in ad hoc committee aad magacawdaan isku gurto oo aaney maalin kaga badan oo wixii lagu hadlay ee Xisbiyada qaranku ku heshiiyeen sida sharciga loo waafajinayo iyo sida diiwaangalintii hore kaadhkii la bixiyay oo aan la nasakhin side la isu waafajinayaa.

**33. Md. Xaashi Xuseen Caabi: -** dhamaan waan salamayaa shirgudoonka iyo xildhibaanada sharafta leh waan salmayaa waxaa maanta in horyaala oo aynu ka hadlaynaa waxaa weeyi laba diwaan galinood sharcigoodii oo la isku soo guray midi waxaa waaeyi kaa taysarada iyo kaa codbixiyashaasha.

Ha ii horaysee labadan xeer in lakala saaro ayaa muhiim ah waayo mid waxaa uu khuseeyaa komishanka doorashooyinka midna waxaa uu khusee

Wasaarada arimaha Gudaha in lakal qaadaan waa waajib haduu sidan isku saarnaado waa xaaraan.

Heshiiskii la gaadhay itii lagu soo kordhiayay eee odhanay qofku aanu qaadan taysarada waxaa uu ka qaadan doonaa meesha lag codaynayo taasina waxaa weeyi mustaxiilaadka jira, oo doorashaba dhici mayso waayo labadiiba way isa saaran jihiin diwaan galinoodba.

Tusaale ahaan waxaan soo qaadataan gudida sugaysa qofka ayaa halkan fadhida halkan kalana waxaa fadhida gudidii kale ee qofka waraysanaysay markaa labadaa gudi mudo intee leeg ayay qaadanaysaa ayaad filaysaan waayo waraysi dheer ayay laga layaan gudidaasi oo ku saabsan information kiisa oo dhan waayo wakhti badan ayay qaadanaysaa, waxaad ka soo qaadaa in ay qaadato 30 daqiiqadood sidaa awgeed anigu waxaan u arkaa halkaa in aan wax heshiisaba aan lagaadhin ayaan qabaa.

Waxaa Gole ahaan la inooga baahan yahay in aan wixii sii faahfaahino oo aan ka shaqayno ayaa la inooga baahan yahay , hadii aan usoo noqdo xeerka waxaan ka halayaa codbixiyayaasha waayo kaa kale anigu ka hadli maayo oo wasaaradii ku shaqada lahayn dib ha loogu celiyo ayaa qabaa waayo xeerkii oo halkan inoo yaala ayaa hawshii soctaa oo dhamaan agabkiiba la keenay oo wax macno ah oo uu wasaarada ugu fadhiyaa ma jiro wax ixtiraama oo golahan loo hayaana ma jirto sidaa awgeed waxaan leeyahay cidii keensatay dib haloogu celiyo.

Inaga waxaa ina khuseeya ka codaynta ee kaa aan ka shaqayno ayaan qabaa oo wax umada anfacana aan soo saarno ayaan odhan lahaa **Qodobka 3aad** meesha waan ka saarayaa oo waxaa la isku xidhay kaadhka iyo codbixintii ayaa la isku xidhay Qodab 4aad diwaan galinta iyo sugida muwaadinku labadani maaha laba wada socda waayo codbixiyayaashu aas-aas umaha aha xeerkanu waxaa uu aas u noqonayaa kaa la leeyahay hala celiyo ee muwaadinimada kaasarana gabi ahaanba meesha halaga saaro ayaan leeyahay.

**Qodobka7aad** isaguna waxaa uu ka hadlayaa ansixintadiwaan galinta markaa waxaan leeyahay ansixintaa meesha halaga saaro, halkaa waxaa ku jira komishanku waa in uu furo diwaann galinta codbixiyayaasha mudo aan ka yarayn mudo aan ka yarayn 6 bilood doorashada ka hor markaa waa in uu dhamaystiro ayaan leeyahay oo ay sii dhamaystirnaato ayaan leeyahay.

**Qodobka 9aad** farqadiisa 1aad dhayalsiga dhibaadata dhacda cida lagu qaadoyo ay tahay cida ka masuulka waxaa lagu ciqaabayaa xeerka ciqaabta guud waxaanan ka saara ama ayaa ku jirtay.

**Qodobka 11aad  farqadiisa 1aad** sixitaanka Xogaha khaldama halkan kuma taalo wax wakhtiya oo haduu muwaadinku qaldamo liiskiisu  lagu saxaa oo hadii aanu muwaadinku waxba akhriyin oo kale miyaa loo akhriyayaa side loo saxayaa? Side se muwaadinku ku ogaanayaa in xogtiisaasi qaldantay xogtiisii? Waxaa kale oo iga su'aala hadii qofkuuu qaldamo ama xog aan sax ahayni kasiibato sidee loo saxayaa?

**Farqada 2aad** ee isla qodobkaas badalka iyo sixitaanka waa in la cayimaa mudada loogu talo galay is badalka sixitaankaa.

**Qodobka12aad** warqada aqoonsiga waxaa halkan kutaala waa la nasakhay halka sarana waxaa lagu sheegay in ay tahay warqad aan wax laga badali karin sidee ayay u nasakhmaysaa hadii ay sidaa tahay waxaanan leeyahay ha la is waafajiyo labadaas.

**Qodobka 17aad** sugitaanka muwaadinka taa waataan meesha ka saaray ee aan nidhi ha la celiyo taas, halka ay ku taalo waxaa sugaya muwaadinka waxaan ku raacsanahay mudanayaashii hore ee iga horeeyay ayaan ku taageersnahay waayo caaqilku meel walba ma joogo taasina aqli maahan ee waxaan leeyahay sida ay soo jeediyeen ayaan ku raacsanahay waayo qodobkaasi doorashooyinka caqabad ayuu ku yahay.

**Qodobka 20aad** farxadiisa 2aad kalmada ku jirta ee ah muhiimada sida loo adeegsadaa waa khalad waayo kalmadaasi waa afcarabi waa in aan ka ilaalino luuqadeena waayo waxay badalaysaa fikirkeenii markaa waa in lagu badalaa sida ay ahmiyada u tahay.

Qodobkasta oo ay taysaro ku jirto meesha waan ka saarayaa waana iska qodoba guud, **Qodobka 25aad** meesha waan ka saarayaa dhamaan tiiba isla **Qodobka 26aad farqada 2aad** oo u dhigan sidan:- Liiska diiwaanka coodbixiyaha waxa soo saaraya Komishanka Doorashooyinka Qaranka laba bilood ka hor xilliga doorshada. Halkii horana waxaan ku soo arkaynay 6 bilood kaana halaga saaro waa xaaraanta xaaraan teediiye oo hala waafajiyo kii hore ee ahaa 6 bilood.

Waxaan leeyahay in la soxo mudooyinka waayo sida aan ku arkayno meela badan oo xeerkan ah in lagu sheegay mudooyin kala duwan waan  in la saxaa halkaa, waxaa kale oo jirta inaan xeerka lagu sheegin in indhaha ama faraha laqaadayo markaa waa in xeerkan lagu cadeeyaa, sidoo kale waxaan meesha ka saarayaa meelkasta oo ay ku taalo warqada taysaradu.

**Qodobka 32aad** sixitaanka iyo muranka da'da codbixiyaha Da'da codbixiyaha waxaa lagu jaangoynayaa da'da muwaadinka ee ku qoran Warqadda Aqoonsiga ee Muwaadinka.  Waxaa ila haboon in halkaa masuuliyiinta lagu daro kuwa

degmada iyo culimada, dhanka kale shaqaalaha la qaadanayo waa in laga qaataa gobolada ay ka socoto diwaan galintu si cadaalada loo helo waayo qofka Hargeisa laga diray ee ka masuulka ah goobaha la geeyo cidna ka garan maayee halaga daayo ayaan leeyahay waa ma suuliyad daree.

Fiisayaasha dal ku galka waxaa laga raabaa ajaanibka oo ha laga saaro muwadiniin **Qodobka 41aad** waxaa leeyahay meesha ay ku jirto madaxda dawlada iyo Hay'addaha sharci fulinta miyayna isku mid ahayn hay'adaha sharci fulinta iyo madaxda dawladu Waxaan leeyahay madaxda dawlada oo kaliya halaha dhigo.

Waxaa kale oo aan aad u taageersanahay xildhibaanada yidhi ha la qabto doorashada madaxtooyada iyo wakiilada waayo dad ayaa lahaa in ay kordhistaan ayay diyaar u yihiin taasina waa mid aan dhacayn mida kale waa in goobaha diwaan galinta goobohooda la badiyaa ayaa soo jeedinayaa oo muwaadiniinta meel walba loogu tagaa wanan ka baxay waad mahadsantihiin mudanayaal.

**34. Md. Maxmad Jamac Cabdi:-** waxaan odhanayaa in dhaw arimood oo koobkooban ayaan odhanayaa waayo salaadii ayaa taagan, sidaa awgeed waxaan rabaa in aan laba kalmadood oo kookooban aan idhaado halkan waxaa yaala xeer laba arimood oo waawayn ka hadlaaya waana duwaan galinta iyo sugitaanka muwaadinka, waxaanan ka bilaabayaa magaca xeerka waxaa ku taala halkan qabyo-qoraalka wax-ka-bedelka iyo kaabista xeerka diiwaangelinta muwaadinnimada iyo codbixiyayaasha waa in aan maskaxda ku hayno wax wax laga badalayaa ee inoo yaalaa waa xeerka diwaan galinta.

Qodobka laxidhiidha duwaan galinta wax laga badalayo wuxuu noqon lahaa xeerka jinsiyada oo xeer jira ah ayuu noqonlahaa oo procedure uun u noqon lahayd xeerkaa jinsiyada ayay noqon lahayd markaa waxaan leeyahay hala yidhaahdo oo ha lagu badalo waxkabadalka iyo kaabista xeerka diwaan galinta, oo qaabka loo sugayaa muwaxaadinka waxay kaabis u tahay xeerka jinsiyada iyo xeerka duwaan galinta labadaba.

Markaa anigu arinka aan ka hadlayaa waxaa weeyi xeerka diwaan galinta wax badan ayaa wax laga badalay oo procedure kiisu waa badanyahay waa xe dheer ee arinta hada inagu cusubi waa arinta madaniga ah.

Marka hore waxaan halkan ka akhriyayaa **xeer Lr. 22** oo golayaasha ka soo baxay qaabka uu u hadlayo, xeerkaasi jinsiyada waxaa uu u qaybinayaa Qayb dhalasho iyo qayb la bixiyo, qaybta u dhalashada ahi waata uu Dastuurku

tilmaamayo **Qodobkiisa 4aad** qof dalka ku isirnaa 60 jun laga soo bilaabo kaasi way cadahay hala is hayb sado ama deegaan halagu xisaabiyo waa arin laga hadli karo inkastoo aanay jirin haybihii.

Waxaa kale oo jira mid la bixiyo oo shuruudo leh o qodobkaasi uu tilmaamayo waxaa kale oo uu tilmaamayaa xeerkaasi habka jinsiyada lagu waayayo hadii jinsiyadii lawaayo waa in aan kaga hadalnaa xeerka ilayn jinsiyadaba waan ka noqon karaayo mid kalaan qaadan karaaye waa in lagu cadeeyaa, qofka jinsiyada la siiyay se ma codaynkaraa? Iyaduna waa in ay xeerka ku cadahay oo aan kaga hadalnaa.

Qofka muwaadinka ah ee aan afsoomaaliga aqoon ee dalka ku isirnaa ee aan aaqilkiisa aqoon maxaa laga yeelayaa? Waxaa uu sheegayaa **Qodobka 3aad** ee jinsiyadu waa in caaqil la aqoonsanyahay oo wasaarada arimaha gudaha ka diwaan gashani uu ka cadeeyaa maxkamad awood u leh horteeda. Halkana arimo kale ayaa ku cad oo caaqilkiiba ma cada meesha uu ku cadaynayaa aanay meel saarnayn waxaa kale oo jirta xeerkaa jinsiyada ee aan ka hadlayo uu tilmaamayo waxaa uu leeyahay waxaa sexeexaya Gudoomiyaha gobolka halkan waxaa la leeyahay goobaha sidaasi waa khilaad oo xeerkaa lalama akhriyin,

waxaa kale oo jira oo xeerka jinsiyadu uu tilmaamayaa meel lagu diwaan galiyo oo ha meel ka mida wasaarada oo uu wasiirku maamulo tan kale waxaa iska lahaa dawladaha hoose oo waxaan wadnaa waa wixii ay qaban lahaayeen dawlada hoose. Macluumaadkaa laqaadayo halkee lagaynayaa? Waa in xeerka lagu tilmaamaa meesha la gaynayo waana in lagu tilmaamaa habka loo qaadayo, waxa kale oo haboon waa in lacadeeyo wada shaqaynta labada xeer ee jinsiyada iyo diwaan galinta.

Anigu waxaan leeyahay marka la sugo jinsiyada muwaadinka waa in uu codaynkaraa waana in la cadeeyaa waayo ma waxaa suugaya komishanka, asxaabta heshiisay lafteedu kumay sigin halkan markaa anuu waxaan leeyahay waa in 6 bilood oo u dhaxaysa duwaan galinta muwaadinka iyo diwaan galinta muwaadin oo wixii soo baxay dariiqadii markii hore lagu diwaan galiyay oo layidhaa muwaadinku waxaa uu tagayaa goobo loo cayimay.

Suuro gali mayso in ay qaataan xilkii diwaangalinta madaniga ah iyo tii haysay codbixiyayaasha waa hal iska hor imanaysaa oo waxaa uu halkan leeyahay waxaa hawshaa qabanaysa warada arimaha Gudaha dhinaca kalana waxaa uu leeyahay waxaa hawshaa qabanaysa komishan markaa waa in aan arinkaa meel dhiganaa waxaanan taageersnahay soo jedintii gudidda waxaanan leeyahay xeerka halgu ansixyo sidii ay xukuumadu ku soo gudbisay waana in la cadeeyaa farqadan lagu daray qodonka 25aad oo lagu cadeeyaa hadii uu

qofku qaadan waayo sidee loo duwaan galinayaa hawshaase yaa qabanaya madawlada hoose ayaa goobihii joogaysa mise komishan ka waa in la kal cadeeyaa.

35. **Md. Maxamed Omar Adan:-** gudoomiye anigu in yar ayaan odhanayaa meelo yar yar oo aan isleeyay waxbaa ka qaldan ama si ka haboon ayaa loo dhigi lahaa tan la leeyahay waxaa reeban in shaqsiyaadka hoos xusan oo loo diwaan galiyo warqada aqoonsiga ama codbixiye ahaan waxaan odhan lahaa warqada aqoonsiga dadkani waa muwaadiniin muwaadinkuna danbi wuu gali karaa ee ayaan laga saarin ee muwaadinimadooda haloo tixgaliyo qoladamaxaabiista ah iyo qof aan gaadhin da'dii codbixyahaya ama diwaan galinta, diwaan galintuna waa wax muwadinka lagu sugaayo waayo qofka yar hadii aan garanayno goorta uu dhashay hala diwaan galiyo si looga maarmo diwaan galinaha danbe.

Waxaa laga maarmilahaa in mar labaad la diwaan galiyo dadka waayo dadkeenu waxay u badan yihiin reer guuraa oo marba meel ayay joogaane sidaa awgeed waxaan leeyahay dadka da'da iyo maxaabiistaba in muwaadinimadooda in la siiyaa waa mid meesha ku jirta waana muhiim ayay aniga ila tahay.

Qdobka 17aad caaqilka waa in la sugaa laftiisa waayo dad badan ayaan jira aan dawlada ka diwaan gashanayn oo reeraha u taliya markaa waxaan halkaa ku kordhin lahaa in lagu daro in nimanka head tooliyinka lagu daro ama qofkii masuul ah ee dhaar ka bixi kara waa in lagu daraa waayo dadkeenu dad iska wada dhaaranaya maahan waayo waxaa jira dadbadan oo ilaahay ka cabsanaya oo marka la yidhaa ku dhaaro aan dhaaran oo dib uga joogsada, waayo dadkeenu aad ayay u filiqsan yihiin caaqilkuna meel walba ma joogo.

Waxaa ii muuqata sida aan kolkii horaba idhi in aan loo baahnayn laba diwaangalinood mar hadii copy gii hore lahaysto waxa cid I cadayso looga baahano waayo copygii ayaa meesha yaala waxaanay ila tahay in ay wakhti uun qaadanayso waxaan odhanlahaa aan xoogeena saarno taa diwaan galinta.

Waxaa kale oo aan leeyahay maadaama aan nahay dal aad u yar oo leh xuduudo open ah in mihiimada la saaro taa muwaadinimada iyadaana saldhig u noqon doonta ta codbixinta, **Qodobka 21aad** magacyadeenu inteena badan waa isku mid oo waxaalaga yaabaa in ilaa ka sadexaad isku mid ay noqdaan markaa form ka diwaan galinta muwaadiniinta ee ah:

1. Magaca muwaadinka oo afran.
2. Magaca Hooyada oo saddexan.
3. Sanadka uu dhashay iyo meesha uu ku dhashay
4. Lab ama dhedig.

5. Saxeexa Muwaadinka ama tilmaan muujinaysa in aanu saxeexi karayn.
6. Lambarka gaarka ah ee lagu diiwaan-geliyay muwaadinka.

Waxaan is idhi hadii hal qodob lagu daro wuu sii cadayn lahaa qofkasi in uu yahay qof gaara oo ka duwan kuwa ay magaca wadaagi karaan malha badanaaba laguma qoro ee walaaha hadii wax laga tilmaamo ama tiro ahaan la qoro waxaan is leeyahay malaha way sii iftiimin lahayd waxaa kale oo aan soo jeedin lahaa in lagu daro xaas mayahay mise waa bilaa xaas qofkani.

**Qodobka 22aad** waxaan ku dari lahaa anoo u jeeda kala soocida in hooyada mageceeda oo sexan lagu daro wan soo jeedin lahaa, **Qodobka 25aad** waxaad moodaa in laba shoqo oo aan isku dhaw ay meesha ku jirto ta diwaangalinta muwaadiniinta iyo codbiyayaasha malaha meelaha laga diwaan galiyaa waa meelo dadka mushtamaca oo dhami ay ogyihiin sanadka uu dhashay halka uu dagan yahay tirade dadka iyo codbixinta meel ka dhacaysa tiradeeda lakiin inga dadkeenu waa reer miyi hadii kolkaa wax saldhiga lahayo oo computer lagu hayo oo dadka ka shaqaynayaa ay badan yihiin ama si kastaba ha noqotee hadii la hayo warqadiisii muwaadinimada oo halkan markhaati lahayo dee foodka wuu gali karaa lakiin caaqil laguma kalsoonaan karo waayo waxaa uu rabaa in reerkoodu bataabuu rabaa.

**Qodobka 29aad** waxaa ku yaala komishanku waa in uu dhan galiyaa ugu raan 6 bilood ka hor maalinta doorashada aniga waxay ila tahay taasi waa ku celclin markaa dadkeenu taas umay bislaan ama ka fog meelaha lagu codaynayo oo aan warba u hayn markaa waxaan leeyahay waa in mudo la siyaa oo qof walba oo muwaadinanan la sugaa oo sida ugu dhakhsaha badan ayaan leeyahay waanad mahadsantihiin.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ------------------------------------------------ | ---------------------------------------- |